JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE

## ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| Sannadka 9aad | Cadad Gaar ah | 04/01/2020 |
|---|---|---|



# XEERKA KA-HORTAGGA MAYDHAANKA LACAGAHA
# XEER LR.87/2019


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2020*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-434/122019 Taar: 23/12/2019

## Wareegto Madaxweyne

**<u>Dhaqan-galka Xeerka Ka-hortagga Maydhaanka Lacagaha Xeer Lr.87/2019</u>**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad ee Datuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-40/833/2019, kuna taariikheysan 16/12/2019, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Ka-hortagga Maydhaanka Lacagaha Xeer Lr.87/2019;

<u>Waxaan soo-saaray;</u>

Dhaqan-galka Xeerka Ka-hortagga Maydhaanka Lacagaha Xeer Lr.87/2019.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka ka-hortaga Maydhaanka Lacagaha Xeer Lr.87/2019**

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: - | Qodobada 13aad , 28aad, 38aad ,53aad, 54aad, 76aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland |
| Markuu Arkay:- | In baahi loo qabo xeer lagu maamulo denbiyada la xidhiidha lacagaha sharci darrada ah iyo maalgelinta argagixisada; |
| Markuu Qaderiyey:- | Soo jeedintii Xukuumada ee Xeerkan ugu soo gudbisay iyo Talla-bixintii Gudidda Dhaqaalaha Golaha Wakiilada. |
| Marku aqoonsaday:- | Siday lama huraan sharci u tahay in loo dhigo aqoonsiga, raadraaca, xayiraadda, qabashada, iyo la wareegidda dheefaha lagu kasbado fal-denbiyeed la galay iyo ujeedooyinka la xidhiidha. |
| Marku ku qancay:- | In nuxurka xeerkani xambaarsan yahay uu sixid iyo toosinba u noqon karo nidaamka maaliyadeed ee Dalka. |
| Markuu dhagaystay:- | Doodii mudaneyaasha Golaha. |
| Marku u codeyay:- | Xeerka ka-hortaga Maydhaanka Lacagaha Xeer Lr.87/2019 Kal-fadhigii 40aad fadhigiisii 16aad taariikhduna ku suntanayd 22/07/2019 oo ay goob joog ahaayeen (44) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha **Golaha Wakiilada** |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah soddon iyo saddex mudane **(33cod)** oo gacantaag ah ku Ansixiyay Xeerka ka-hortaga Maydhaanka Lacagaha **Xeer Lr.87/2019** , halka **shan (5) mudanena** ka diideen, **shan (5)** mudanena ka aamuseen **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caaddada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JS

Baashe Maxamed Faarax
GuddoomiyahaeeGolahaWakiilada JSL.

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

## Golaha Wakiiladdu

**Markuu Arkay: -** Qodobada 13aad, 28aad, 53aad, 54aad, 76aad, 77aad iyo 78aad

**Markuu Arkay: -** In baahi loo qabo xeer lagu maamulo denbiyada la xidhiidha lacagaha sharci darrada ah iyo maalgelinta argagaxisada;

**Markuu Qaderiyey: -** Soo jeedintii Xukuumada ee Xeerkan ugu soo gudbisay iyo Talla-bixintii Gudidda Dhaqaalaha Golaha Wakiilada.

**Markuu Aqoonsaday: -** siday lama huraan sharci u tahay in loo dhigo aqoonsiga, raadraaca, xayiraadda, qabashada, iyo la wareegidda dheefaha lagu kasbado fal-denbiyeed la galay iyo ujeedoouinka la xidhiidha.

**Marku ku qancay: -** In nuxurka xeerkani xambaarsan yahay uu sixid iyo toosinba u noqon karo nidaamka maaliyadeed ee Dalka.

**Markuu dhagaystay: -** Doodii mudenayaasha Golaha.

**WUXUU ANSIXIYAY**

**XEERKA KA-HORTAGA MAYDHAANKA LACAGAHA**

## UTUBKA 1AAD

## MABAADII GUUD

### Qodobka 1aad

### Eray Bixin

Xeerkan gudihiisa, haddii aan si kale loo qeexin, ereyada hoos ku xusani waxa ay yeelanayaan macanaha soo socda:

“**Agabka maaliyadeed ee qoran**” (**negotiable Instruments**) waxa loola jeedaa agab kasta oo lacageed oo la qaadan karo sida jeegagga wareega, waraaqaha ballanqaadyada lacageed iyo amarada lacag bixinta.

“**Baanka**” waxa loola jeedaa Baanka Somaliland ee lagu aasaasay Xeerka Baanka Dhexe Xeer Lr.54/2012.

“**Bangi aan lahayn jiritaan rasmi ah**” (**shell bank**) waxa loola jeedaa bangi aan si rasmi ah uga jirin ama aan sharciyad ka haysan dalka laga asaasay, wada shaqaynna aan la lahayn shirkad maaliyadeed oo u shaqaysa si waafaqsan xeer dawladeed oo si wada jir ah loo kormeeri karo.

“**Dhaqdhaqaaq maaliyadeed**” waxa loola jeedaa hawl kasta oo ay qabato hay’ad maaliyadeed’ sida ku qeexan Xeerka Baanka Dhexe Xeer Lr. 54/2012 ama waxa ay noqon karaan hawalaha soo socda:

a) Qabashada dhigaallada iyo lacagaha kale ee dadweynaha loo hayo, marka lagu daro kuwa ay qabtaan bangiyada gaarka ah;

b) Amaah siinta oo ay ku jirto daymaha macaamiisha la siiyo, daymaha guryaha, iibinta daymaha, haddii wax

laga helo iyo haddii kaleba, iyo maalgelinta dhaqdhaqaaqyada ganacsi;

c) Adeegyada xawaaladeed ee loo bixiyo si toos ah ama si dadban.

d) Bixinta iyo maaraynta hababka lacag bixinta (sida kaadhadhka lacag la bixida, kaadhadhka daymaha, jeegaga, jeegaga wareega, ammarada lacag bixinta iyo casaynta banaanka, iyo diritaanka lacagaha elektaroonigga ah);

e) Dammaanadaha iyo ballan-qaadyada maaliyadeed;

f) Ka ganacsiga:

  i. Aaladaha suuqa iibsiga lacagaha, oo ay ka mid yihiin jeegagga, biilalka, caddaymaha dhigaallada iyo heshiisyada maaliyadeed ee qiimahoodu ku tiirsan yahay hantiyaha kale;

  ii. Sarrifka lacagaha qalaad iyo isku beddelidooda;

  iii. Damaanaadaha wareega; iyo waxii kale ee xeer hoosaad lagu sheego.

g) Maaraynta maalgashiyada kala gaarka ah iyo kuwa isku dhafan;

h) Kaydinta iyo maamulidda lacagaha naqadka ah ama waraaqaha daymaha ee dad kale loo hayo.

i) Dammaanad qaadka iyo qaybinta adeegyada caymiska ama takaafulka.

**"Dhaqdhaaqyada shakiga leh"** waxaa loola jeedaa dhaqdhaqaaq kasta oo aan waafaqsanayn sooyaalka dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee macmiilka isla

markaana aan lahayn qeexid (sharraxaad) dhaqaale ama mid sharci.

**"Dembiyada horseedka ah"** waxa loola jeedaa fal-denbiyeed kasta oo ay ka dhalato dheef maaliyadeed xitaa haddii gebi ahaantii ama qayb ahaan lagu galay dalka dibaddiisa.

**"Dheef fal-denbiyeed"** waxa loola jeedaa lacag kasta, hanti kasta, ama faa'ido kasta oo si toos ah ama si dadban looga dheefay ama loo helay, oo ka dhashay ama xidhiidh la leh fal-denbiyeed, iyada oo aan loo eegayn aqoonsiga qofka denbiga galay.

**"Eedaysane"** waxa loola jeedaa shakhsi ama **Shirkad** lagu soo oogey fal-denbiyeed, haddii xukun ku dhaco iyo haddii kaleba.

**"Fal-denibyeed"** waxa loola jeedaa fal-denbiyeed ku cad qodob sharci oo ku jira xeer Somaliland dhaqan gal ka ah **wakhtiga la galay ama gaabiska lagu kacay**, ama waa fal dhan ka ah qodob sharci oo dhaqan gal ka ah dal shisheeye kaas oo haddii Somaliland lagu geli lahaa fal-denbiyeed ku noqon lahaa sharciga Somaliland.

**"Ganacsi"** waxaa loola jeedaa hawl kasta oo sharci ah oo ay ku jirto yeelashada hanta, ha noqoto mid faa'iido laga dheefo ama mid aan laga dheefin**.**

**"Ganacsiyada iyo mihnadaha gaarka ah ee aan la xidhiidhin maaliyad"** waxa loola jeedaa:

a) Wakaalada guryaha dhisa ama iibiya;

b) Gacsiyada iibiya ama dillaala biraha iyo dhagxaanta qaaliga ah;

c) Xisaabiyayaasha si madax bannaan ugu shaqaysta ama wada shaqayn la leh shirkadaha xisaabaadka;

d) Ururrada aan dawliga ahayn;

e) Adeegyada abuuritaanka iyo maaraynta shirkadaha;

f) Ganacsiyada iyo mihnahada kale ee ay soo waajihi karto khatarta lacagha sharci darrada ah, kuwaas oo Guddoomiyuhu ku dhawaaqi karo isaga oo la tashanaya Waaxda;

**“Guddida”** waxa loola jeedaa Guddida La-talinta Maydhaanka Lacagaha Sharci-darrada ah ee lagu asaasay qodobka 18aad ee Xeerkan.

**“Guddoomiye”** waxa loola jeedaa Guddoomiyaha Baanka Dhexe ee Jamhuriyadda Somaliland.

**“Hanti”** waxa loola jeedaa dhammaan aaladaha lacageed iyo dhammaan hantida dhabta ah (guurto /ma guurto) ama shay kasta oo qiimo leh oo shakhsi leeyahay ama hay’adi (shirkadi) leedahay, sifaday doonto ha lahaatee, hantidaasi Somaliland ha ku taallo ama meel ka baxsanbee.

"**Hantiilaha Dhabta ah** " waxa loola jeedaa sakhsiyaadka dabiici ah ama qaannuuni ah oo si kama dambays ah ugu tasarrufi kara shirkad ama hay’ad.

**“Hanti wasakhaysan”** marka ay fal-denbiyeed la xidhiidho, waxa loola jeedaa:

a) Hanti kasta oo loo adeegsaday, loogu talo galay in loo adeegsado, ama xidhiidh lala leh gelitaan denbi;

b) Dheef kasta oo laga helay fal-denbiyeedka; ama

c) Hanti kasta oo taalla Somaliland oo laga dheefay denbi lagu galay dal kale taas oo amar maxkamadeed lagu soo rogi karo, marka la adeegsado iyada oo aan denbi gaar ah lala xidhiidhineyn waxa loola jeedaa in ay tahay hanti wasakhaysan oo loo eego fal-denbiyeed xadhig ka dhalan karo.

**“Hanti lala wareegi karo”** waxa loola jeedaa:

a. Hanti la maydhaamay;

b. Dheef laga helay ama aalado loo adeegsaday ama loogu talo galay in lagu adeegsado maydhaanka lacageed ama fal-denbiyo horseed ah;

c. Hanti ah dheef laga helay, ama mid loo adeegsaday, ama loogu talo-galay ama loo qoondeeyey in loo adeegsado, maalgelinta fal-denbiyeed kasta; iyo

d. Hanti leh qiime u dhigma.

**“Hay’ad Kormeer”** waxa loola jeedaa Baanka Dhexe ee Somaliland;

"**La wareegid**" waxa loola jeedaa amar maxkamadeed oo dawladda loogu wareejinnayo lahaanshiiyaha hanti loo adeegsaday ama la doonayey in loo adeegsado in lagu galo fal-denbiyeed, sida uu dhigayo qodobka 183aad ee Xeerka Ciqaabta Guud.

**“Maamulka sare ee Baanka”** waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha, ku-xigeenka iyo Agaasimaha guud.

"**Maalgelinta argagixisada”** waxa loola jeedaa hanti kasta oo loo bixiyey si toos ah ama si dadban, gebi ahaan ama qayb ahaan, si loogu galo (fuliyo) fal argagixiso.

**“Maxkamad”** waxa loola jeedaa maxkamadda awoodda u leh.

**“Maydhaanka lacagta”** waxa loola jeedaa hawl-fududeynta adeegsiga lacag ama hanti lagu helay (dheefay) sifo sharci darro ah (fal-dembiyeed) oo la doonayo in la dhex mariyo hay’ad maaliyadeed si ay ugu ekaato sharci iyadoo la qaadayo mid ka mid ah falalka ku xusan qodobka 4aad ee Xeerkan.

**“Qabasho hanti”** waxa loola jeedaa gacan ku dhigidda hanti qof leeyahay ama sito oo ay qabtaan saraakiisha

awoodda u lihi si caddayn u noqoto denbi lagu eedeeyey qofka hantida laga qaaday.

**"Qof"** waxaa loola jeedaa qof ama shaqsiyaad dabiici ah (natural person).

"**Shakhsi qaanuuni ah**" waxa loola jeedaa hay'ad kasta oo leh jiritaan ka madax-bannaan saamileydeeda ama aasaasayaasheeda isla markaana iskeed u oogi karta looguna oogi karo dacwad.

"**Shakhsiyaadka siyaasadda ku lugta leh"** waxa loola jeedaa qof kasta oo xil qaran ka soo qabtay ama ka haya dalka Somaliland ama dalal kale, ama xil dawladeed ka qabtay dawladda Somaliland, waxaana ka mid ah: Xil madaxweyne, siyaasi, sarkaal meeqaam sare leh (madani, ciidan ama garsoor), saraakiisha sare ee Xisbiyada siyaasadda iyo dhammaan xubnaha qoysaska sakhsiyaadka kor ku xusan, ama cid kasta oo gacan-saar dhaw oo ganacsi ama maaliyadeed la leh.

**"Shirkadaha iyo shakhsiyaadka"** waxa loola jeedaa shakhsiyaadka dabiiciga ah iyo shirkadaha, ha noqdaan qaanuuni ama yaanay noqone, ee ku xusan qodobka 20aad ee Xeerkan.

**"Shirkad"** waxaa loola jeedaa Hay'ad (Shirkad) loo asaasay ama loo diiwaangeliyey si waafaqsan Xeerka Shirkadaha, Xeer.Lr. 80/2017, waxaana ay noqon kartaa mid waddani ah ama mid shisheeye.

**"Urur denbiile ah"** waxaa loola jeedaa koox kasta oo abaabulan lehnaqaab dhismeed u gaar ahsi ay u fuliyaan, u maalgeliyaan ama u taageeraan si loo galo fal-dembiyeed ama fal argagixiso oo liddi ku ah nabadda iyo xasilloonida.

"**Xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland**" waxa loola jeedaa Xeerka Baanka Dhexe ee Xeer Lr. 54/2012.

**"Xayiraad"** waxa loola jeedaa joojinta diritaanka, beddalaadda, qaaditaanka, ama dhaqaajin lacageed,

hantiyeed ama kahinta dhaqdhaqaaq maaliyadeed iyada oo loo cuskanayo amar maxkamadeed sida ku qeexan qodobka 14aad ee Xeerkan.

**"Xisaabta ku dayn bixidda"** waxa loola jeedaa xisaab Baan shisheeye ku leeyahay Bangi waddani ah oo macaamiishiisa u suura geliya inay dhaqdhaqaaq maaliyadeed ku sameeyaan magaca Baanka shisheeye.

**"Waaxda (Unit)"** waxaa loola jeeda waaxda dabagalka Dhaqdhaqaaqyada Maaliyadeed (Financial Reporting Unit) ee ku xusan Cutubka 2aad, qodobka 5aad ee Xeerka.

## Qodobka 2aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Ka-Hortagga Maydhaankaka Lacagaha **Xeer Lr. 87/2019**

## Qodobka 3aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddada Xeerkani waxaa ka mid: -

1. In lagu maamulo denbiyada la xidhiidha lacagaha sharci darrada ah iyo maalgelinta argagixisada;

2. In uu jideeyo tallaabooyinka lagula dagaallamayo xad-gudubyada la xidhiidha maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada, iyo;

3. In uu sharci u dhigo aqoonsiga, raadraaca, xayiraadda, qabashada, iyo la wareegidda dheefaha lagu kasbado fal-denbiyeed la galay iyo ujeedooyinka la xidhiidha.

## Qodobka 4aad
## Fal-denbiyeedka maydhaanka lacagaha

1. Qof ama shirkadi waxa ay ku kaceen fal-denbiyeed maydhitaan lacageed haddii ay: -

a. Ogaayeen ama ay ahayd in ay ogaadaan in lacag ama hanti ay tahay ama ay qayb ka tahay dheef lagu hantay sifo sharci darro ah isla markaana qofka ama shirkaddu ay: -

i. Beddalaan, qariyaan, madow geliyaan isha sharci darrada ah iyo in ay diraan lacagta ama hantida; ama

ii. Guddoomaan, adeegsadaan ama la wareegaan gacan ku haynta hantida si badheedh ah.

iii. Uu awood u siiyo ama kaalmeeyo cid kasta oo gashay ama faraha kula jirta fal-denbiyeed, ha ku gasho falka gudaha Somaliland ama meel kale, si ay uga ilaaliso in denbiga lagu oogo; ama

2. Xeerkan gudihiisa, fal sharci darro ah waxa loola jeedaa fal kasta oo lagu mamnuucay qodobada Xeerkan.

## CUTUBKA 2AAD

## WAAXDA DABAGALKA DHAQ-DHAQAAQYADA MAALIYADEED EE BAANKA DHEXE

### Qodobka 5aad
### Asaaska Waaxda Dabagalka Dhaqdhaqaaqyada Maaliyadeed

1) Waxa Xeerkan lagu asaasay waax magaceedu yahay Waaxda Dabagalka Dhaq-dhaqaaqyada Maaliyadeed **(Financial Reporting Unit)** oo ahaan doonta waax ka mid ah Baanka dhexe, lehna shaqaale, miisaaniyad iyo qaab-dhismeed u gaar ah, kaas oo Guddoomiyuhu xeer-nidaamiye ku soo saari doono.

2) Awoodaha iyo waajibaadka shaqo ee Xeerkani siinayo Waaxda, waxay kaga wakiil ahaaynaysaa Baanka dhexe ee Somaliland.

## Qodobka 6aad
## Ujeeddooyinka Waaxda

1) Ujeeddada ugu weyn ee Waaxdu, iyadoo ka wakiil ah Baanka, waa in ay gacan ka geysato aqoonsiga dheefaha denbiga ah iyo la dagaallanka maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada.

2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn faqradda 1aad, Waaxdu waxa ay:

a) U gudbin doontaa macluumaadka ay ururiso hay'adaha baadhitaanka, hay'adaha kormeerka iyo hay'adaha kale ee ku shaqada leh fududeynta maamulidda iyo fulinta sharciga ee Somaliland.

b) Is-dhaafsan doonaan macluumaadka iyo denbiyada la xidhiidha hawlaha maydhaanka lacagaha hay'adaha dhiggeeda ah ee dalalka kale.

c) Xaqiijin doontaa in ay u hoggaansanto hababka caalamiga ah iyo hab-dhaqannada wanaagsan ee aduunku isla qaatay in ay ugu wanaagsan yihiin la dagaallanka maydhaanka lacagaha.

d) Qaadi doontaa tallaabooyinka habboon, ee ay ka mid yihiin hawlo ay u heshay dhinacyo saddexaad, si loo xaqiijiyo in macluumaad kasta oo ay ururisay iyo/ama ay u gudbisay hay'adaha baadhitaanka iyo hay'adaha kormeerka loo adeegsado oo keli ah aqoonsiga dheefaha denbiyada iyo la dagaallanka maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada aan loona adeegsan ujeeddo kasta oo kale waxa ay doonto ha noqotee.

e) Qaadi doontaa tallaabooyin ku habboon si ay u ilaaliso asturnaanta macluumaadka ay soo

ururisay aanay/ama gudbisay in loo daahfuro si sharciga baal-marsan iyo ama in ay dhinacyo saddexaad u adeegsadaan si khaldan.

**Qodobka 7aad**
**Shaqooyinka iyo Awoodaha Waaxda**

1. Si ay u gudato waajibaadkeeda, Waaxdu waxay: -

a) Qaban doontaa, lafa-guri doontaa, ka war bixin doontaa isla markaana macnayn-na doontaa:

i) Warbixinaha aan caadiga ahayn ama dhaqdhaqaaqyada laga shakiyey ee ay soo gudbiyaan shirkaduhu;

ii) Macluumaad loo daahfuray ama ay ku heshay si waafaqsan Xeerkan;

b) Macluumaadka ay u hesho si waafaqsan Xeerkan u diri doontaa hay'adaha fulinta sharciga ee ku habboon, hay'ad kasta oo sirdoon, ama hay'ad kasta oo kormeer si ay tallaabooyin dheeraad ah uga qaadaan haddii, marka ay eego warbixinaha, Agaasimuhu helo caddayn macquul ah oo uu ka shakiyo in dhaqdhaqaaqa maaliyadeed ama hawl gaar ahi ay lug ku leedahay dheefo denbi, maydhaanka lacageed ama maalgelin argagixiso;

c) Wakhti kasta, fari kartaa baadhitaan uu fuliyo baadhe uu qoraal ahaan awood u siiyey Agaasimuhu, waxaanu baadhuhu geli karaa goob shaqo oo shirkadeed saacadaha shaqada ee caadiga ah si uu u baadho waraaqo kasta oo loo kaydiyey si waafaqsan waajibaadka Xeerkan, waxaanu weydiin karaa su'aal kasta oo la xidhiidha waraaqahaa, qoraal ayaanu ka samaysan

karaa, waxaanu nuqullo sawir ah ka qaadan karaa dhammaan waraaqaha ama badh ka mid ah;

d) Qoraal ku amri kartaa in shirkad soo gudbisay warbixin dhaqdhaqaaq laga shakiyey sida uu dhigayo qodobka 30aad ee Xeerkani in aanay dhammaystirin dhaqdhaqaaqa warbixintiisa la soo gudbiyey;

e) U diri doontaa hay'adaha fulinta sharciga ee ku habboon, hay'adaha sirdoonka, ama hay'adaha kormeerka, macluumaad kasta oo ay ka soo dheegatay baadhitaan ay u samaysay si waafaqsan faqradda (c) haddii baadhitaankaasi shaki macquul ah geliyo Agaasimaha in dhaqdhaqaaq maaliyadeed ama hawl gaar ahi ay ku lug leedahay dheefo denbi, maydhaanka lacageed ama maalgelin argagixiso;

f) Fari kartaa shirkad in ay:

i) U soo gudbiso macluumaad kale ama macluumaad dheeraad ah ama waraaqo si Waaxdu u gudan karto shaqooyinka Xeerkani dhigayo; ama

ii) Qaaddo tallaabooyin ku habboon oo ay ku fududeyneyso baadhitaan kasta oo la wado ama ay qaadi doonto Waaxdu oo ay ka mid yihiin in ay bixiso waraaqo ama macluumaad kale oo loo baahan yahay;

g) Ururin kartaa tirakoobyada iyo qoraallada, waxa ay ku baahin kartaa macluumaadka Somaliland gudaheeda ama meelo kale oo sharci ah, waxaanay talabixin ka samayn kartaa macluumaad ay heshay, waxaanay la talin kartaa Guddoomiyaha;

h) Diyaarin doontaa tababarrada loo baahan yahay ee la xidhiidha dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed, kaydinta qoraallada iyo waraaqaha Waaxda iyo isku dubba-ridka waajibaadyada iyo waxbixinaha la siinayo shirkadaha si waafaqsan qodobada Xeerkan;

i) La tashan kartaa qof kasta oo u qalma in ay talo weydiiso, hay'ad ama urur iyada oo ujeeddadu tahay in ay si habboon u adeegsato awoodaheeda iyo waajibaadka Xeerkani saaray;

j) Muddadiiba mar faafinta rasmiga ah u daabici doontaa macluumaadka uu ku taliyo Guddoomiyuhu;

k) Abuuri doontaa, ilaalinna doontaa, xog-kaydiye lagu ururiyo dhammaan warbixinaha laga shakiyey, macluumaadka Dawladeed ee la xidhiidha iyo waxyaabaha kale ee Agaasimuhu muddadiiba mar go'aamiyo in ay la xidhiidhaan shaqada Waaxda;

l) Bixin kartaa macluumaadka la xidhiidha fal-denbiyeed la galay waax dabagal maaliyadeed oo kasta oo shisheeye ama hay'ad sharci fulineed oo shisheeyo oo ku habboon, iyada oo la buuxinyo shuruudo kasta oo Agaasimuhu u tixgelin karo in ay habboon yihiin;

m) Iyada oo ku salaynaysa heshiis wadajir ah iyo wax-is-weydaarsi siman, qoraal ahaan kula geli kartaa heshiis ama qorshe kasta, waax dabagal maaliyadeed oo shisheeye taas oo Guddoomiyuhu u arko in ay lama huraan tahay ama ay u wanaagsan tahay in ay gudato ama qabato shaqooyinka laga doonayo; Iyada oo ay shardi tahay in Guddoomiyuhu ku qanco, codsi kastana

gaarkiisa u eego, in waaxda dabagalka maaliyadeed ee shisheeye ay bixisay ballanqaad sax ah oo:-

i) Ay ku ilaalinnayso asturnaanta wax kasta oo la soo gaadhsiiye; ama

ii) Ay ku xakamayneyso sida loo adeegsanayo macluumaadkaa;

n) Qabyo-qoraal ka samayn doontaa Xeer-nidaamiyayaasha uu waajibinneyo Xeerkani, iyada oo ay la tashaneyso Guddida, si ansixintiisa loogu gudbiyo Guddoomiyaha ka hor inta aan lagu daabicin Faafinta Rasmiga ah;

o) Dejin doontaa siyaaasadaha ka hortagga maydhaanka lacagaha iyada oo la tashaneysa Guddida;

p) Yeelaneysaa awoodda ay ku khasbi karto soo-saaritaanka ama lagu heli karo dhammaan kaydka qoraallada, waraaqaha, ama macluumaadka looga baahan yahay in lagula socdo u hoggaansanaanta ka baxsan baadhitaanka goobta shaqada;

q) Qaban kartaa hawl kasta oo sharciga ku bannaan, keligeed ama iyada oo la kaashanaysa urur kale oo Somaliland ka jira ama dal kale, iyada oo tiigsanaysa in ay ujeeddooyinka ay u dhisan tahay kor u qaaddo;

r) Gudan kartaa shaqooyinka kale ee la xidhiidha maydhaanka lacagaha sida uu hadba Guddoomiyuhu ku taliyo;

s) Waaxdu waxa ay ka codsan kartaa hay'ad kormeer oo kasta, hay'ad lacageed, hay'adda dejisa xeerarka maaliyadda, wakaaladda

cashuuraha, ama wakaaladda baadhitaanna wax-is-daba-marinta in ay siiyaan macluumaadka macquulka ah ee ay u baahan tahay si ay si habsami leh ugu gudato shaqooyinka Waaxda ee Xeerkani dhigayo ama si ay u gaadho ujeeddooyinka Xeerka; iyo

t) Yeelan doontaa dhammaan awoodaha lama huraanka u ah ama ku habboon in ay si sax ah u gudato shaqooyinkeeda.

**Qodobka 8aad**
**Magacaabista Agaasimaha iyo Agaasime ku Xigeenka**

1) Waaxdu waxa ay yeelan doontaa Agaasime iyo Agaasime ku Xigeen.

2) Agaasimaha iyo Agaasime ku Xigeenku waxa ay noqon doonaan sakhsiyaad ku habboon oo aqoon iyo karti shaqo leh, waxa magacaabaya Guddoomiyaha Baanka, isla markaana waxaa xilka ka qaadaya Guddoomiyaha si Xeerkan waafaqsan.

3) Shuruudaha lagu magacaabi karo Agaasimaha/Agaasime ku Xigeenka waxaa ka mid ah: -

a) Inuu jaamacad la aqoonsan yahay ka haysto shahaadada heerka 1aad ee sharciga, maamulka hay’adaha dawladda, maaraynta, xidhiidhka caalamiga ah, dhaqaalaha ama maaliyadda;

b) Inuu ugu yaraan shan sannadood oo khibrad shaqo oo shaqada loo magacaabayo xidhiidh la leh uu leeyahay; iyo

c) Inuu buuxiyo shuruudaha kale ee ay ku talin karto Guddida la talintu.

**4) Xil ka qaadista Agaasimaha/ ku-xigeenka**; Gudoomiyuhu waxa uu xilka kaa qaadayaa Agaasimaha Waaxda ama ku-xigeenkiisa haddii;

a) Ay jirto caddayn dan maaliyadeed oo gaara oo dhex martay Agaasimaha/ ku-xigeenka iyo shirkad ka mid ah shirkadaha Xeerka lagu dhaqayo;

b) La caddeeyey inuu musallafay (**Agaasimaha/ ku-xigeenka**) ama uu qorshe uu (**agaasimaha/ ku-xigeenka**) ku dayn baxayo la galay dhinacyo dayn ku leh; ama

c) Ay maxkamadi ku heshay (**agaasimaha ama ku-xigeenka**) fal-denbiyeed xukunkiisu yahay xabsi muddadiisu ka badan tahay lix bilood.

5) Agaasimaha iyo Ku-xigeenkiisu waxa ay ku shaqaynayaan shuruudaha iyo waajibaadka uu Guddoomiyuhu qeexo, ka dib marka uu la tashado Guddida si Xeerkan waafaqsan.

**6) Is-casilaadda Agaasmaha/ ku-xigeenka**;

a) Agaasimaha ama Agaasime ku Xigeenku way is casili karaan iyaga oo qoraal ahaan ugu gudbinaya Guddoomiyaha.

b) Is-casilaadi waxa ay dhaqan gal noqonaysaa marka uu helo Guddoomiyuhu ama cid uu Guddoomiyuhu awood u siiyey in ay qabato.

## Qodobka 9aad
## Masuuliyadaha Agaasimaha

1) Agaasimuhu waxa uu noqon doonaa Madaxa Fulinta ee ugu sarreeya Waaxda, waxaanu masuul ka noqonayaa hagiddeeda iyo maarraynteeda.

2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn tilmaamaha guud ee faqradda (1) ee qodobkan, Agaasimuhu isaga oo ah

Madaxa Fulinta ee ugu sarreeya, waxa uu masuul ka yahay:

a) Suggidda madax-bannaannida hawlaha Waaxda;

b) Diyaarinta qorshe hawleedka, miisaaniyadda iyo siyaasadaha Waaxda;

c) Ilaalintaa iyo ka war haynta anshaxa shaqaalaha;

d) Iyo qaadashada dhammaan go’aamada lagu fulinayo awoodaha Waaxda, laguna gaadhayo ujeeddooyinka, shaqooyinka iyo waajibaadkeeda.

3) Agaasimuhu waxa uu u gudan doonaa shaqooyinka xafiiska isaga oo raacaya xayn-daabka siyaasadeed ee uu ku talin karo Guddoomiyuhu marka uu la tashado Guddida.

**Qodobka 10aad**
**Maamul-daadejinta Agaasimaha**

1) Iyada oo loo raacayo Xeerkan, Agaasimuhu waxa uu qoraal ahaan ugu igman karaa awoodihiisa iyo hawlihiisa shaqo ee Xeerkani dhigayo sarkaal ama saraakiil ka mid ah Waaxda, hadba sida uu u go’aamiyo isagu.

2) Waxa uu Agaasimuhu marka uu doono wax ka beddali karaa ama laali karaa igmasho uu u sameeyey si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan.

**Qodobka 11aad**
**Xilka Agaasime Ku-xigeenka**

1. Isaga oo ku hawl galaya dhammaan awoodaha, qabanayanaya shaqooyinka Xeerkani dhigayo ee Agaasimaha, agaasime ku-xigeenku, waxa uu shaqadiisa ku simaya Agaasimaha: -

a) Marka uu maqan yahay ama mar kasta oo Agaasimaha si sharciga waafaqsan xilka looga qaado ama shaqada looga joojiyo iyada oo loo eegayo qodobka 8aad;

b) Wuxuu kale oo qaban karaa hawlaha kale ee uu Agaasimuhu u igmado.

**Qodobka 12aad**
**Magacaabidda Shaqaalaha**

1) Guddoomiyuhu waxa uu ansixin karaa shuruudaha iyo waajibaadka guud ee shaqooyinka Waaxda, balse marka uu sidaa yeelayo, ma qaadi karo tallaabo loogu talo galay in lagu wiiqo madax bannaannida Waaxda, ta Agaasimaha, ta Agaasime ku Xigeenka ama shaqaalaha Waaxda.

2) Waaxdu waxa ay go'aamin kartaa shaqaalaha ay yeelanayso, waxaanay magacaabi kartaa saraakiisha kale ee lama huraanka u ah in ay gudato shaqooyinka Xeerkani dhigayo si waafaqsan shuruudaha iyo waajibaadka guud ee shaqada.

3) Waaxdu waxa ay heshiis shaqo la geli kartaa shakhsi kasta oo ay ka mid tahay waax dawladeed oo kasta si ay ugu qabtaan shaqooyin ama hawlo cayiman oo gaar ah.

**Qodobka 13aad**
**Dhaarta ilaalinta Sirta**

1) Agaasimaha, Agaasime ku Xigeenka, shaqaalaha, wakiillada Waaxda ama cid kasta oo kale oo loo shaqaaleysiiyey si waafaqsan qodobka 14aad, waxa, inta aanay shaqada bilaabin ka hor, maxkamadda horteeda kaga dhaaran doonaan in ay ilaalinayaan sirta shaqada.

2) Agaasimaha, Agaasime ku Xigeenka, shaqaalaha, wakiillada Waaxda ama cid kasta oo kale oo loo shaqaaleysiiyey si waafaqsan qodobka 14aad, waxa waajib ku ah in ilaaliyaan macluumaad kasta oo ay ku heleen xayn-daabka shaqadooda, xitaa marka ay shaqadu ka dhammaato ka dib.

3) Macluumaadkaa sirta ah waa in aan loo adeegsan ujeeddo aan ahayn kuwa oo dhigayo Xeerkani.

4) Haddii Agaasimaha, Agaasime ku Xigeenka, shaqaalaha, wakiillada Waaxda ay jebiyaan waajibaadka shaqo ee qodobkan 15aad dhigayo, waxa ay galeen fal-denbiyeed loo raaci doono shakhsiyadooda.

## Qodobka 14aad
## Xayiraadda lacagaha, Hantida iyo Dhaqdhaqaaqyada

1) Agaasimuhu, isaga oo cuskanaya caddaymo macquul ah, waxa uu maxkamad u gudbin karaa codsi ka socda dhinaca Waaxda oo uu kaga dalbanayo inay bixiso amar (ogolaansho) ay shakhsi kaga joojineyso (iyada oo loo eegayo shuruudaha iyo filashooyinka ku cad amarka), in aanu sina ugu tagri faloi karin hantida xayiraaddeeda la dalbaday (amarku la xidhiidho) muddo aan ka badnayn hal bil, iyada oo muddada amar maxkamadeed lagu kordhin karo ugu badnaan hal bil oo kale, iyada oo amarka lagu salaynayo caddayn macquul ah.

2) Amar xayiraadeed ah waxa lagu ridi karaa:

a) Hanti lala wareegi karo iyada oo lagu caddaynayo amarka xayiraadda ahna hantida uu hayo qofka amarka xayiraadda lagu riday;

3) Maxkamadi waxa ay amar xannibaad ah bixin kartaa oo keli ah haddii ay ku qanacdo in:

b) Baadhitaan denbi culus oo loo hayo caddaymo macquul ah laga bilaabay Somaliland gudaheeda;

c) Sarkaal dawladeed aanu karayn in uu sharraxaad ka bixiyo isha uu ka helay hanti uu haysto ama sida uu ku yeeshay hantidaa isla markaana ay jirto tilmaan macquul ah oo sheegaysa in hantidu tahay dheef denbiyeed; ama

d) Ay jirto aaminaad macquul ah oo tilmaamaysa in qofka hab-nololeedkiisu ku salaysan yahay denbi, denbigaana uu ka dheefay, waxaana shardi ah si loo bilaabo ama loo fuliyo codsi xayiraad in aanay jirin eed denbi oo hore, ama dacwad la sugayo ama xukun dhacay oo la xidhiidha hawl sharciga baal marsan ama fal-denbiyeed maydhaanka lacageed.

4) Si looga hor tago in hanti lala wareegi karo ama qayb ka mid ah in la bixiyo ama loo qaado si ka dhan ah amarka xayiraadda, maxkamadda bixinaysa amarka xayiraaddu waxa ay samayn kartaa amar dheeraad ah oo ay sarkaal boolis ku farayso in uu gacanta ku dhigo hantidaa haddii maxkamadda la hor-dhigo caddaymo macquul ah oo tilmaamaya in hantida lala baxayo ama laga qaadayo goobteeda.

5) Amar hanti lagu xannibayaa waxa uu muujin doonaa muddo ogeysiis la siinayo shakhsiyaadka amarku saamaynayo, taas oo aan ka badnayn (7) maalmood.

6) Iyada oo aan hoos loo dhigeyn awoodaha guud ee faqradda (1) ee qodobkan, waxa amarka xayiraaddu uu cuskan karaa qodobada ay maxkamaddu u aragto in ay macquul ku yihiin: -

a) Kharashaadka nololeed ee qofka amarka xayiraadda lagu riday iyo qoyskiisa;

b) Kharashaadka sharci ee ku baxaya dhegaysiga dacwadda sida uu dhigayo Cutubkan ama dhegaysiga dacwad denbi oo kasta oo dhegaysigu xidhiidh la yeelan karo; iyo

c) Sii wadidda baayac-mushtari, ganacsi, mihnad ama shaqo, waxaana shardi ah in maxkamaddu dhigto shuruudaha ay u aragto in ay habboon yihiin si loo xaqiijiyo in amarka xayiraaddu noqdo wax ku ool, maxkamadduna ay ku qanacdo in qofka kharashaadkiisa la bixin doonaa bixiyey,

isaga oo dhaartay, dhammaan danaha uu ku leeyahay hantida la xayirayo, oo qofkuna aanu iska bixin karin kharashaadka ama aanu ku sii ganacsan karin ama ku shaqaysan karin hantidiisa ama mihnadda oo aan la xayirin.

7) Maxkamadda samaynaysa amarka xannibaadda ahi waxa ay bixin kartaa amarro dheeraad ah oo lagu maamulayo hantida la xannibayo ama la amray in la qabto.

8) Maxkamadda bixisay amarka xannibaaddu:

a) Waxay, haddii ay codsi ka hesho shakhsi amarku saamayn ku yeeshay, ay beddali kartaa ama ka noqon kartaa amarka xannibaadda ama amar kala oo ku lammaan haddii ay ku qanacdo:

i) In hawl-gelinta amarka la doonayo bixintiisu uu ka xayuubinnayo codsadaha habka uu kula soo baxo nolol maalmeedkiisa, sababna u noqon karo in codsaduhu la kulmo dhibaato aanu qaadi karin; iyo

ii) In Culayska amarka ka dhasha ee codsadaha fuulaa ka weyn yahay khatarta ay hantidu ku burburi karto, ku lumi karto, ku dhaawacmi karto, lagu qarin karo ama lagu wareejin karo; iyo

b) Waxa ay ka noqon doontaa amarka xannibaadda haddii eedaysanaha aan lagu xukumin muddo ay maxkamaddu u aragto in ay macquul tahay.

9) Amar hanti lagu xayiray waxa uu jiri doonaa inta uu soo baxayo go'aan racfaan lagaga qaatay amarka.

## Qodobka 15aad –
## Awoodda Gelidda iyo Baadhidda

1. Waaxdu waxa ay qoraal kaga codsan kartaa shirkadaha iyo shakhsiyaadka macluumaad ay ku xaqiijineyso in ay Xeerkan u hoggaansan yihiin iyo in aanay shirkadaha iyo shakhsiyaadku ku lug lahayn hawlo la xidhiidha maydhaanka lacageed ama maalgelin argagixiso.

2. Waaxdu waxa ay wakhti macquul ah geli kartaa xafiisyada shirkadaha ama shakhsiyaadka ay aaminsan tahay, iyada oo caddayn macquul ah haysa, in xad-gudub halis ahi ka dhacay.

3. Shirkadda la baadhayo iyo sarkaal iyo shaqaale kasta waxa ay bixinayaan una gudbinayaan baadhaha dhammaan buugaagta, xisaabaadka iyo waraaqaha kale ee shirkadda, iyo farriimaha ay direen ama helaan, warbixinaha iyo macluumaadka la xidhiidha shirkadda, ganacsigeeda iyo macaamilkeeda uu u baahan karo baadhuhu *muddo toddoba maalmood gudahood ah ama wakhtiga uu baadhuhu ku dalbado qoraal ahaan.*

4. Haddii lagu guul-darraysto in lagu bixiyo buugaagta, xisaabaadka, kaydka qoraallada, farriimaha la isweydaarsaday, warbixinaha, ama macluumaadka kale muddada ku cad faqradda 2(a) ee qodobkan waxa ay noqonaysaa fal-denbiyeed ka dhan ah Xeerkan.

5. Buugaag xisaabeedka iyo waraaqaha kale ee loo baahan yahay bixintooda, laga saari maayo xafiiska shirkadda muddada baadhitaanku ku socdo shirkadda ama goobta kale ee lagu bixiyey.

6. Baadhuhu waxa uu sawiran karaa buugaagta, xisaabaha iyo waraaqaha kale ee uu u baahan yahay in uu warbixintiisa ka diyaariyo.

7. Dhammaan macluumaadka baadhitaanka lagu helay waxa ay noqonayaan kuwo sir ah loona adeegsado oo kale ah ujeeddooyinka Xeerkan.

8. Baadhuhu waxa uu warbixin u gudbin doonaa Agaasimaha, isaga oo isdul taagi doona haddii la jabiyey ama aan la dhawrin waajibaadka Xeerkan ama xeer-nidaamiyayaasha ka farcamay.

9. Agaasimuhu waxa uu qoraal ahaan ku ogeysiin doonaa, kadib marka uu siiyo shirkadda fursad macquul ah oo lagu dhegaysto, in shirkaddu u hoggaansanto taariikh cayiman oo muddo cayima gudaheed oo uu qoraalka ku caddayn doono, tilmaamaha lama huraanka ah ee la xidhiidha arrin kasta oo ka soo baxay warbixinta ku xusan_faqradda (2aad)_ee qodobkan.

10. Agaasimuhu waxa uu macluumaadka uu u helay si waafaqsan qodobkan u gudbin karaa hay'adaha awoodda u leh haddii ay jirto caddaan macquul ah oo la xidhiidha fal-denbiyeed.

11. Shakhsi kasta oo:

    a. Diida ama ku guul-darraysta in uu u hoggaansamo waxyaabaha uu doonayo baadhuhu oo uu fulin aro sakhsigaasi, ilaa xadka uu kari karo in uu u hoggaansamo; ama

    b. Hor-is-taaga ama caqabad ku noqda baadhe marka uu fulinayo awoodaha Xeerkani dhigayo, waxa uu galay fal-denbiyeed_ka dhan ah Xeerka.

## CUTUBKA 3AAD –

## GUDDIDA LA TALINTA KA HORTAGGA MAYDHAANKA LACAGAHA

### Qodobka 16aad –
### Guddida la Talinta ka Hortagga Maydhaanka Lacagaha

1) Waxa Xeerkan lagu asaasay Guddi magaceedu yahay Guddida la Talinta ka Hortagga Maydhaanka Lacagaha oo ka kooban:

a) Wasiirka Maaliyada

b) Guddoomiyaha Baanka;

c. Xeer Ilaaliyaha Guud;
d. Taliyaha Booliska;
e. *Guddoomiyaha Machadka Xisaabiyayaasha Dawladda ee Somaliland*
f. Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sirdoonka Qaranka;
g. Laba qof oo kale oo uu Guddoomiyuhu ka soo magacaabi doono ganacsatada hawlaha Maaliyadda ee madaxa-bannaan, kuwaas oo aqoon iyo khibrad u leh arrimaha la xidhiidha maydhaanka lacagaha;
h. Iyo Agaasimaha Waaxda oo noqon doona xoghayaha Guddida.

2. Xubnaha ku xusan faqradaha (a) ilaa (h) qof ahaan ayay kaga qayb geli karaan ama wakiil ay soo dirteen.
3. Shakhsi loo magacaabay si waafaqsan faqradda 1(g) waxa uu xafiiska joogi doonaa muddo saddex sanno ah, waxaanu u qalmaa in dib loo magacaabo hal muddo xileed oo dheeraad ah oo aan ka badnayn saddex sannadood.
4. Marka ay arrin falanqaynayso, waxa ay Guddidu dooran karaan xubnaha ugu muuqda in ay leeyihiin aqoon ama waaya-aragnimo gaar ah oo la xidhiidha ka hortagga maydhaanka lacagaha iyo la dagaallanka maalgelinta argagixisada.

**Qodobka 17aad –**
**Waajibaadka iyo Shaqooyinka Guddida**

1) Shaqooyinka Guddidu waxa ay noqon doonaan:

a) Waxaanay si guud ugala talin doonaan Baanka iyo Waaxdaba gudashada hawlaha iyo awoodaha Xeerkani siiyey ee la

xidhiidha maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada;

b) Habsami u maamulidda xogaha iyo dukumentiyada lagu xelay si waafaqsan Xeerkan.

c) Go’aaminta iyo socodsiinta faldambiyeedyada la xidhiidha dalal shisheeye ama is-dhaafsiga dembiilayaasha. Taageeridda gudashada awoodda Xeerkani siinayo Baanka Dhexe.

d) Waxay ahaanaysaa Madal ay Waaxda, ururrada ay ku bahoobeen shirkaduhu, xubnaha dawladda iyo hay’adaha kormeerku kaga wada tashadaan arrimaha ka soo kordha ka hortagga maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada, arrimaha ay tebayaan iyo dedaallada kale;

e) Waaxdu waxa ay siin doontaa Guddida taageero maamul si ay awood ugu yeelato in ay Guddidu si hufan ugu gudato shaqooyinkeeda.

2. Guddidu waxa ay warbixin seddex biloodle ah siin doontaa Golaha Wakiillada iyo Wasaarada Maaliyadda;

3. Gudashada shaqo kasta oo kale oo Xeerkani ku talin karo.

## Qodobka 18aad
## Kulamada Guddida iyo Habraacooda

1. Guddidu waxa ay kulmaysaa sannadkii afar goor ugu yaraan, waxayna kulamadu ku qabsoomayaan oo martigelinaysa xarunta dhexe ee Baanka. Waxaa kale oo Guddida u bannaan inay ku kulmaan hadba meeshii kale la isla garto.

2. Hadii loo baahdo Guddidu waxa ay qabsan karaan kulamo aan caadi ahayn si ay hawlaha u yaalla u fuliyaan.
3. Kooramku guddidu waxa uu noqonayaa lix xubnood in ay goob-joog ahaadaan kulan kasta oo ay Guddidu qabsanayso;
4. Guddoomiyaha Baanka ayaa guddoomin doona dhammaan kulannada gudida.
5. Haddii uu maqan yahay Guddoomiyuhu, xubnaha goob-joogga ah ayaa iska dhex dooaran doona mid ka mid ah si uu u guddoomiyo kulanka.
6. Haddii aanay si kale isugu raacin lix xubnood, ogeysiis qoraal ah ayaa ugu yaraan 7 maalmood hortood maalinta kulanka Guddida la gaadhsiin doonaa xubin kasta oo Guddida ka mid ah.
7. Go’aanada Guddidu waxa lagu qaadanayaa aqblabiyad hal dheeri ah, haddii codadku siman yihiinna, Guddoomiyaha ama xubinta kale ee shirka guddoomineysaa codkooda way dhiibanayaan;
8. Xubin kasta oo joogta kulanka Guddidu yeelanayso ama guddi-hoosaad yeelanayo, waxa ay xaq u leedahay in aragtidiisa/teeda lagu qoro hadal-qoraalka kulanka.
9. Xubin Guddida ka mid ah oo dan toos ah ama mid dadban ka leh arrintan hor taalla ama hor iman doonta Guddida waxa uu isla marka uu ogaado xaqiiqooyinka arrinta la xidhiidha, waa in uu Guddida la socodsiiyo dantiisa, mana fadhiisan doono kulamada lagu falanqaynayo arrinta.
10. Guddidu waxa ay qori doontaa oo ay kaydin doontaa hadal-qoraalka dhammaan kulamadooda, kulan kasta hadal qoraalkiisana Guddida ayaa ku xaqiijin doonta kulanka kaa ku xiga ee Guddida, waxaana saxeexi doona Guddoomiyaha ama xubinta shirka guddoomineysa.

## CUTUBKA 4AAD

## KA HORTAGIDDA MAYDHAANKA LACAGAHA IYO MAALGELINTA ARGAGIXISADA

### Qodobka 19aad –
### Shirkadaha iyo Mihnadaha Xeerkani qabanayo

1. Waajibaadka lagaga hor tagayo maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada ee Xeerkani dhigayaa waxa ay qabanayaan shirkadaha iyo shakhsiyaadka soo socda:

   a) Shirkad maaliyadeed oo kasta oo ku qeexan Xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland, oo ay ka mid yihiin laamaha iyo faracyada iyo xafiisyada wakiillada u ah shirkado maaliyadeed oo aan degganayn dalka ama cid kasta oo ku hawlan shaqo maaliyadeed oo ku qeexan Xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland iyo Xeerkan.

   b) Shirkadaha caymiska, shirkadaha maal galinta ganacsiyada yaryar iyo dhamaan hay'adaha qabta adeeg maaliyadeed.

   c) Shirkad kasta oo ku jirta ganacsi aan maaliyad ahayn marka ay qorsheynayaan ama ay macaamiishoodu u fulinayaan dhaqdhaqaaq maaliyadeed oo ka mid ah kuwan soo socda:

      i) Iibinayaan ama dillaalayaan biraha ama dhagxaanta qaaliga ah oo qiimahoodu yahay SL Shilling 150,000,000/ (Boqol iyo konton Milyan) ama ka badan;

      ii) Iibinta ama iibsashada guryaha ama dhulka;

      iii) Iibsashada ama iibinta hantida guurtada ah;

XAFIISKA QARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

iv) Maaraynta lacagta macaamiisha, waraaqaha daymaha ama lahaanshiiyaha shirkadaha, ama hanti kale;

v) Furitaanka ama maaraynta xisaabaha baananka;

vi) Abaabulka lacagaha lagu abuurayo, lagu hawl geliynayo ama lagu maaraynayo shirkado; iyo

vii) Abuuridda, hawl gelinta ama maaraynta shakhsiyaadka qaanuuniga ah ama qorsheynta, iyo iibsashada ama iibinta shirkadaha ganacsi;

d) Adeeg-bixiyayaasha abuura hay'adaha iyo shirkadaha.

## CUTUBKA 5AAD

## HUFNAANTA HAWLAHA MAALIYADEED

### Qodobka 20aad – Aqoonsiga Macaamiisha

1) Shirkadaha iyo shakhsiyaadka Xeerkani qabanayaa waa inay aqoonsadaan, hubiyaanna aqoonsiyadooda macaamiishooda xaaladahan hoos ku xusan, gaar marka ay:

a) Bilaabayaan xidhiidh ganacsi;

b) U fulinayaan dhaqdhaqaaq maaliyadeed oo aan joogto ahayn oo qiimahiisu le'eg yahay ama ka badan yahay SlSh 150,000,000SL (Boqol iyo konton milyan Shilin) shaqsi aan hore macmiil ugu ahayn Shirkad maaliyadeed.

c) Dirayaan, qabanayaan ama bixinayaan lacag naqad ah xaddiga ay doono ha noqotee, ama dhaqdhaqaaq oo kasta oo

looga shakiyey maydhaanka lacageed ama maalgelin argagixiso.

d) Shirkadda ama shakhiga soo gaadho xawaalad lacageed oo elektaroonik ah oo aan wadan macluumaad dhammaystiran oo ku saabsan soo diraha lacagta;

e) Shirkadda ama shakhsiga uu shaki ka galo xaqiiqada ama dhammaystirnaanta xog aqoonsi oo ay hore uga hayeen macmiil ka mid ah macaamiishooda.

2) Shirkad ama shakhsi uu qabanayo Xeerkni, waxa ay qaadi doonaan tallaabooyin macquul ah oo codsade kasta oo doonaya in uu la galo xidhiidh ganacsi ay ka dalbadaan in uu u keeno qoraal rasmi ah oo muujinaya aqoonsiga runta ah ee codsadaha, sida:

a) Haddii uu yahay qof dabiici ah, waxa lagu aqoonsanayaa:

i) Keenitaanka kaadh aqoonsi oo asal ah;

ii) Baasaaboor aan dhicin, oo uu saaran yahay dal-ku-gal ama deganaansho, haddii uu macmiilku u dhashay dal shisheeye;

iii) Ruqsad wadidda gaadiidka (darawalnimo);

iv) Dammaanad caaqil; ama

v) Aqoonsi kasta oo kale oo lagu kalsoonaan karo oo uu Baanku aqbalaaddiisa wareegto ku soo saaro.

b) Haddii ay tahay shakhsiyad qaanuuni ah, oo ay ku jiraan hay'adaha caalamiga ah ama safaaradaha shisheeye, waxa lagu aqoonsanayaa:

vi) Shirkadaha ganacsiga, heshiiska asaaska shirkadda iyo ruqsad ganacsi oo aan dhacsanayn;

vii) Ururrada aan dawliga ahayn, shahaadada diiwaan gelinta; ama

viii) Safaaradaha shisheeye, baasaaboorka diblamaasiyadeed iyo waraaqaha aqbalaadda Wasaaradda Arrimaha Dibadda;

c) Haddii ay tahay waax dawladeed, warqad uu soo qoro Xisaabiyaha Guud.

3) Marka uu Xeerkani dhaqan gal noqdo, shirkadaha iyo shakhsiyaadku waxa ay qiimeyn iyo u kuur gelid ku samayn doonaan macaamiishooda.

4) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waa in ay hubiyaan aqoonsiga hantiilayaasha dhabta ah ee shakhsiyaadka qaanuuniga ah, sida hay'adaha awqaafta iyo kuwa la midka ah, iyaga oo helaya waraaqo ku filan oo muujinaya lahaanshaha iyo qaab-dhismeedkooda maamul.

5) Haddii ay u muuqato shirkad ama shakhsi in codsade doonaya in uu dhaqdhaqaaq u fuliyo, haddii uu xidhiidhka ganacsi sii wadayo iyo haddii kaleba, cid kale, shirkadda ama shakhsigu waxay qaadayaan tallaabooyin macquul ah oo ay ku sugayaan aqoonsiga runta ah ee qofka magaciisa lagu fulinayo dhaqdhaqaaqa, ha noqdo maamule waqaf, qof magacaaban, wakiil ama cid kale.

6) Haddii waajibaadka faqradaha (1) – (5) ee qodobkan aan la fulin, shirkadda ama shakhsigu ma furi doonaan xisaab, ma bilaabi doonaan ama ma sii wadi doonaan xidhiidh ganacsi ama ma fulin doonaan dhaqdhaqaaqa. Xaaladahan oo kale, shirkadda ama shakhsigu waa in ay Waaxda u gudbiyaan warbixin dhaqdhaqaaqa shaki leh.

7) Ma jiro wax ku mid ah qodobkan oo ka dalbanaya in la bixiyo caddayn aqoonsi haddii dhaqdhaqaaq ama taxane dhaqdhaqaaqyo ahi ay dhacayaan inta xidhiidhka ganacsi socdo, haddii codsaduhu uu caddayn lagu qanci karo ka bixiyey aqoonsigiisa.

## Qodobka 21aad –
## Reebbanaanta Xisaabaha Dahsoon

1) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku ma hayn doonaan xisaabo dahsoon, ama xisaabo ku furan magacyo been abuur ah.

2) Xisaabo noocan ahi haddii ay jireen dhaqangalka Xeerkan ka hor, waa in Baanku ku xidho muddo (9) bilood gudahood ah oo ka bilaabanta taariikhda Xeerka la ansixiyo.

## Qodobka 22aad –
## Reebbanaanta Xidhiidhka Baanan aan lahayn Jiritaan Rasmi ah (Shell Banks)

Shirkadaha iyo shakhsiyaadka waxaa ka reebban in ay la yeeshaan ama ay la sii wadaan xidhiidh ganacsi oo ay kula jireen, noocuu doono ha noqdee, Baanan aan lahayn jiritaan rasmi ah, amahay'ad maaliyadeed iyo shakhsi kasta oo aan xafiis rasmi ah ku lahayn dalka lagu aasaasay ama uu ruqsadda ka haysto.

## Qodobka 23aad –
## Kala Soocidda Macamiisha iyo u-kuur-galka khataraha Maydhaanka Lacagaha iyo Maalgelinta Argagixisada

1) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waxa ay macaamiishooda u kala saari doonaan kuwo khatartoodu sarreyso iyo kuwo ay hooseyso iyaga oo ku salaynaya heerka khatarta ee ka dhalan karta nooca xidhiidhka ganacsi ee ay la yeelanayaan. Waa in lafagurka khatarta loo fuliyo si waafaqsan tilmaamaha ay Waaxdu soo saari doonta.

2) Waa in shirkadaha iyo shakhsiyaadku ay fuliyaan u dhug yeelashada macaamiishooda si waafaqsan qodobada 24aad iyo 25aad ee Xeerkan, oo sida ay u kala horreeyaan u kala khuseeya macaamiisha khatartoodu sarreyso iyo kuwa ay hooseyso.

3) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waa in ay waraaqo ku filan ka hayaan ujeeddada iyo nooca xidhiidh kasta oo ganacso iyo xisaab kasta oo ay furayaan si ay u hayaan macluumaad ku filan oo tilmaami kara dhaqdhaqaaqa laga fili karo macmiilka si waafaqsan qodobka 27aad ee Xeerkan.

4) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waxa ay fulin doonaan Qiimeyn Gudahooda ah oo ay ku ogaanayaan Khatarta maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada ee la soo darsi kara dhammaan adeegyada maaliyadeed ee ay bixiyaan labadii sannadoodba hal mar. Qiimaynta jaadkaas ah waa in lagu kaydiyo qoraal ahaa.

## Qodobka 24aad –
## Dhug-yeelasho adag

1) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waxa ay yeelan doonaan hab-raacyo adag oo ay ugu dhug yeelanayaan macaamiisha khatartoodu sarreyso oo ay ku jiraan shakhsiyaadka siyaasadda ku lugta leh.

2) Dhammaan shakhsiyaadka siyaasadda ku lugta leh ama shirakadaha iyo hay'adaha ay shakhsiyaadkaasi wax ku leeyihiin, xubin ka yihiin guddiyadooda agaasinka, ama ay ka hayaan xil sare oo maareyneed waxa loo aqoonsanayaa in khatartoodu sarreyso.

3) Qodobkani waxa kale oo uu qabanayaa:

a) dhaqdhaqaaqyada waaweyn ee aan loo baran, iyo dhaqdhaqaaqyada hab-dhacooda aan aanu badnayn ee aan lahayn ujeeddo dhaqaale oo muuqata ama keeni karta shaki maydhaanka lacageed ama maalgelin argagixiso;

b) Xidhiidhada ganacsi ee lala leeyahay shakhsiyaad ama shirkado/hay'ado xidhiidh la leh dalal ay hay'ada Is bahaysiga dhaqaalahu (Financial Action Task Force) u aqoonsan tahay in ay khatartoodu sarreyso.

4) U dhug yeelashada macaamiisha waxa ugu yaraan ku jiri doona:

a) Oggolaansho qoraal ah oo maareeyayaasha sare ku oggolaadeen in xisaab la furo ama la sii hayo;

b) Tallaabooyin macquul ah oo lagu sugayo isha hantida ama lacagtu ka soo gasho macmiilka;

c) Helitaanka macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan danta laga leeyahay xidhiidhka ganacsi;

d) Helitaanka macluumaad macquul ah oo ku saabsan sababta dhaqdhaqaaqa loo doonay in la fuliyo ama loo fuliyey;

e) La socosho dhaw oo lagu hayo xidhiidhka ganacsi, iyada oo la kordhinayo tirada iyo wakhtiyada la soo rogayo xakamaynaha, iyo doorashada noocyada dhaqdhaqaaq ee u baahan in baadhitaan dheeraad ah lagu sameeyo; iyo

f) Waajibaad kasta oo dheeraad ah oo waafaqsan wareegto ay soo saartay Waaxdu.

5) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku muddadiiba mar ayay dib u eegi doonaan, cusbooneysiinna doonaan waraaqaha iyo macluumaadka ay hore uga qabteen macaamiisha.

## Qodobka 25aad
## Dhug-yeelasho sahlan

1. Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waxa ay macaamiisha loo arko in khatartoodu hooseyso ku dabbiqi karaan hab-raacyo u dhug-yeelasho oo sahlan. Tallaabooyinkaa la fududeeyay waxa ka mid ah:

   a) Hubinta aqoonsig macmiilka iyo hantiilaha dhabta ah kadib marka la unko xidhiidh ganacsi;

   b) Yaraynta soo noqnoqoshada cusbooneysiinta aqoonsiga macmiilka;

   c) Yaraynta heerka daba-gal ee lagu samaynayo dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee joogtada ah, iyada oo lagu salaynayo heer lacageed oo macquul ah; ama

   d) In aan la ururin macluumaad gaar ah oo loo qabanayo in lagu fahmo ujeeddada iyo nooca xidhiidhka ganacsi, balse laga dheehanayo ujeeddada iyo nooca dhaqdhaqaaqa ama xidhiidhka ganacsi ee la unkay.

## Qodobka 26aad
## Dabagalka dhaqdhaqaaqyo gaar ah

1. Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waa inay u yeeshaan fiiro gaar ah arrimahan:

   a. Dhaqdhaqaaq maaliyadeed oo isku dhafan, kuwa qadderkooda lacageed aad u sarreeyo iyo kuwa noocyadooda hore loo arag isla markaana lahayn ujeeddo ganacsi oo cad.

   b. Xidhiidhada ganacsi ee ay la yeelanayaan shakhsiyaadka iyo shirkadaha ka soo jeeda dalal aan lahayn ama uu hooseeyo heerka la dagaallanka maydhaanka lacagta iyo maalgelinta argagixisadu.

## Qodobka 27aad
## U dhug-yeelashada Bangiyada Wakiillada ah

1) Shirkadaha maaliyadeed ee dalka ka hawl gala marka ay xidhiidh wada shaqayneed (wakiilnimo) la samaysanayaan Baan wakiil u ah waxaa ku waajib ah inay:

   a) Aqoonsadaan isla markaana qiimeeyaan sumcadda Baanka ay wakiil ka dhiganayaan iyo tayada kormeerka dawladeed ee saran Baanka.

   b) Ka helaan oggolaansho qoraal ah maamulka sare ee shirkadda ka hor inta aanay xidhiidh wakiilnimo la yeelan Baan dibadeed (shisheeye);

   c) Qiimayn ku sameeyaan xeerarka, siyaasadaha iyo habraacyada uu ku dhaqmo dhiggooda wakiilka ahi si uu uga hortago maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada;

   d) Ka heshiiyaaan masuuliyadaha dhinac kasta saran.

2) Haddii xidhiidhku yahay mid ay ku furayaan “xisaab dayn-bixineed”, shirkadaha maaliyadeed waa in ay xaqiijiyaan in baanka wakiilka ahi:

   a) Hirgeliyey habraacyo ku filan oo wax-ku-ool ah si uu macaamiishiisa u aqoonsado uguna dhug-yeesho;

   b) Ogol yahay inuu bixin doono xogta uu hayo ee ku saabsan aqoonsiga macmiilka haddii loo baahdo.

## Qodobka 28aad
## Kaydinta Xogta

1) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waa in ay hayaan, ugu yaraan shan (5) sannadood oo ka bilaabanta taariikhda fuliyey dhaqdhaqaaq, dhammaan kayd-qoraallada dhaqdhaqaaqyada ee lama huraanka ah, gudo iyo dibad-ba. Kayd-qoraalladan waxa ku jiri doonaa faahfaahin ku filan oo lagu aqoonsanayo:

a) Magaca, cinwaanka uu deggan yahay iyo cinwaanka boosta iyo shaqada (ama haddii ay habboon tahay, ganacsiga ama hawsha uu qabto) shakshi kasta –

i) oo dhaqdhaqaaq fulinaya; ama

ii) oo magaciisa dhaqdhaqaaqa lagu fulinayo;

iii) Iyo sidoo kale habka uu adeegsaday shakhsiga ama shirkaddu si ay u hubiyaan aqoonsiga shakhsigaas;

b) Nooca, wakhtiga iyo taariikhda dhaqdhaqaaqa;

c) Nooca iyo qadderka lacageed ee la dhaqdhaqaaqa lagu sameeyey;

d) Nooca iyo lambarka lagu aqoonsanayo xisaab kasta oo ka furan shirkadda oo dhaqdhaqaaqu maray;

e) Haddii dhaqdhaqaaqu yahay aalad aan ahayn lacag, magaca qofka la siiyey, magaca shikadda siisay, magaca qaataha (haddii uu jiro), qadderka iyo taariikhda aaladda, lambarka (haddii uu jiro) aaladda iyo faahfaahinta cidda dhabarka ka saxeexday;

f) Magaca iyo cinwaanka shirkadda iyo sarkaalka, shaqaalaha ama wakiilka shirkadda ee diyaariyey kayd-qoraalka dhaqdhaqaaqa.

2) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waxa ay hayn doonaan kayd-qoraalka ay ku helaan u dhug yeelashada ku hayeen macmiilka si waafaqsan qodobka 19aad ee Xeerkan ugu yaraan shan (5) sannadood kadib marka uu xidhiidhka ganacsi istaago.

3) Shirkad ama shakhsi kastaa waxa ay xaqiijin doonaan in xisaabaha macaamiishooda lagu hayo magaca saxda ah ee cidda leh xisaabta.

4) Xogta aqoonsiga iyo kayd-qoraallada dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed waa in sida ugu dhakhsaha badan loogu gudbiyaa sharaakiisa Baanka ee awoodda u leh marka ay soo dalbadaan.

## Qodobka 29aad
## Ka warbixinta Dhaqdhaqaaqyada shakiga leh

1) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waa inay muddo kow iyo labaatan (21) maalmood gudahood ku wargeliyaan Baanka dhammaan faahfaahinta ku saabsan dhaqdhaqaaq kasta oo shaki abuuri kara oo xidhiidh la leh:

a. Maydhaanka lacageed ama lacag kasta oo laga dheefay oo loogu talo galay in denbi lagu galo; ama.

b. Lacag loo adeegsaday ama loogu talo galay in loo adeegsado maalgelin argagixiso; ama,

c. Dhaqdhaqaaq lacgeed oo Shaki leh oo naqad ah ama dhaqdhaqaaqyo taxane ah oo shaki leh oo awadartoodu le'eg tahay ama ka badan tahay SlSh 150,000,000 (Boqol iyo konton milyan) ama uu fulinayo shakhsi aan hore macmiil ugu ama xisaabi uga furnayn shirkadda maaliyadeed.

2) Shirkad ama shakhsi soo gudbiyey warbixin dhaqdhaqaaq shaki leh si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan waxa ay warbixinta shakiga leh ku gudbin doonaan niyad wanaag, balse haddii kale loogama baahna in ay muujiso in ay macquul ahayd in ay warbixinta gudbiso.

3) Shirkad ama shakshi gacanta ku haya dhaqdhaqaaq ay ka shakiyeen, oo ay tahay in looga warbixiyo si waafaqsan faqradda 1aad ama 2aad ee qodobkan, way sii wadi karaan iyaga oo dhammaystiraya dhaqdhaqaaqa wixii ka danbeeya laba maalmood oo shaqo kadib maalintii ay warbixinta gudbiyeen, haddii aanay Waaxdu qoraal ahaan kaga dalban in aanay dhammaystirin dhaqdhaqaaqa si Waaxda ama hay'ad kale oo ku habbooni u sameeyaan baadhitaan.

4) Kadib marka ay gudbiyaan warbixin dhaqdhaqaaq shaki leh, shirkadaha ama shakhsiyaadku waxa ay bixin doonaan macluumaad dheeraad ah hadba sida ay hay'adaha ku shaqada lihi uga codsadaan.

5) Qofka si badheedh ah ugu guul-darraysta in uu u hoggaansamo waajibka ka saaran in uu warbixin u gudbiyo si waafaqsan qodobkani waxa uu galay fal-denbiyeed.

6) Qofka si badheedh ah u siiya Waaxda ama sarkaal kale oo awood u leh isaga oo og in macluumaadku yihiin been ama ay marrin-habaabis yihiin waxa uu galay fal-denbiyeed.

7) Qofka isaga oo siiya warbixin ama sawir been ah, ama bixiya waraaqo been ah oo u ogyahay in ay ku jiraan qoraal ama xog uu ogyahay in ay been tahay, shirkad ama shakhsi, ama hay'ad kormeer ama Waaxda, waxa uu galay fal-denbiyeed.

## Qodobka 30aad
## Bixinta Xogta Macmiilka

1) Shirkadaha ama shakhsiyaadka waxa waajib ku ah in ay bixiyaan xogta macmiilka ee laga shakiyay oo lama huraan u ah in Waaxdu si macquul ah shaqadeeda u qabsato, iyadoo Waaxdu qoraal kaga soo codsanaysa xafiiska xeer ilaalinta.

2) Marka ay xeer ilaalintu ku qanacdo codsiga waaxda waxa ay u siinaysaa qoraal u fasaxaya in ay shirkadaha ama shakhsiyaadku bixin karaan xogta ay ka hayaan macmiilka shakigu galay.

3) Shirkadaha ama shakhsiyaadka waxa looga baahan yahay in codsi kasta oo Waaxdu ku dooneyso in macluumaad loogu gudbiyo ay ka dhigaan qarsoodi, marka laga reebo in bixinteeda ay maxkamad awood u lihi ugu baahato dhegaysi dacwadeed.

4) Masuuliyad sharci ayaa ka dhalanaysa hadii la jabiyo waajib dhigayey in sir laga dhigo ama si kale loo ilaaliyo bixinta macluumaadka, Xeerkii doonaa ha soo rogee, haddii loo hoggaansamay waajib uu soo rogey Xeerkani.

## Qodobka 31aad
## Reebanaanta Masuuliyad sharci haddii loo warbixiyo si sharciga Waafaqsan

1) Shirkadaha iyo shakhsiyaadka, agaasimayaashooda, saraakiishooda iyo shaqaalahoodaba looma raaci doono masuuliyad ay ka dhalan karto ciqaab denbi, mid madani ah, ama mid maamul haddii ay xog qarinteeda uu waajiyey qodob sharci, xeer-nidaamiye, qodob maamul ama heshiis la galay, haddii warbixin dhaqdhaqaaq shaki leh si sharciga waafaqsan loogu gudbiyey Waaxda.

## Qodobka 32aad
## Nidaamka ka hortagga Maydhaanka Lacagaha ee Shirkadaha

1) Shirkadaha iyo shakhsiyaadku waxa ay barnaamijyo u gaar ah oo ay ka mid yihiin:

   a) Siyaasado iyo habraacyo qoran oo lagaga hortagayo maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada;

   b) Habraacyo ay ku kala shaandeeyaan shaqaalaha ay qaadanayaan oo heerkoodu sarreeyo;

   c) In ay yeeshaan sarkaal heer maarayneed ah oo shaqadiisu tahay in uu hirgeliyo siyaasadaha, xakamaynaha iyo habraacyada ka hortagga maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada;

   d) Tababarka shaqaalaha iyo maareeyayaasha oo joogto ah oo la gelin doono faylashooda shaqaalenimo; iyo

   e) Hanti-dhawre madax bannaan oo hubiya u hoggaansanaanta iyo wax ku oolnimada hirgelinta siyaasadaha, xakamaynaha iyo habraacyada lagaga hortagayo maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada ee uu dhigayo Xeerkani.

2) Shirkadaha maaliyadeed ee ka kooban dhawr qaybood waa in barnaamijyada ay kaga hor tagayaan maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada lagu dabbaqo dhammaan laamaha shirkadda iyo faracyada ay aqlabiyad saamiyadeeda leeyihiin. Siyaasadahan waxa ku jira siyaasadaha iyo habraacyada ay xogta u wadaagayaan si loo helo xogta macaamiisha iyo maaraynta khataraha maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisada, waana in ay jirtaa ilaalo

ku filan oo lagu dhawrayo asturnaanta xogta la is-dhaafsaday.

**Qodobka 33aad –**
**Ka warbixinta Lacagaha Xuduudaha ka gudba**

1) Qof kasta oo soo geliya ama kala baxa dalka lacag naqad ah ama macdan ama agab maaliyadeed oo qiimahoodu u dhigmo ama ka badan yahay SLSh 150,000,000 (Boqol iyo konton milyan) waa in uu ku wargeliyo saraakiisha Waaxda Kastamada ee ku sugan xuduudaha.

2) Haddii saraakiisha Waaxda Kastamku ka shakiyaan in qofka sitaha ahi ku xad-gudbey waajibka ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waxay awood u leeyahay in ay:

   a) Baadhaan wax kasta oo qofka laga shakiyey sito; iyo

   b) Baadhaan shakhsiga (qofka).

3) Qofka ama dadka laga shakiyey waxa baadhi kara oo keliya sarkaal ay jinsi ahaan isku mid yihiin lab ama dheddig.

4) Saraakiisha Kastamka waxay joojin karaan, geli karaan oo baadhi karaan gaadiid kasta oo loo adeegsaday in lagu qaado lacagta naqadka ah, macdanta amaagabka maaliyadeed ee qiimaheedu Qoran tahay (negotiable Instruments).

5) Haddii, iyada oo xaqiiq ku salaysan, saraakiisha waaxda Kastamku ka shakiyaan in shakhsiga ay baadhayaan faraha kula jiro maydhaanka lacageed ama maalgelin argagixiso, waxay awood u leeyhiin inay qabtaan lacagta, macdanta ama agabka maaliyadeed ee uu sito.

6) Waaxda Kastamku waxa ay masuul ka noqonaysaa haynta lacagta, macdanta ama agabka maaliyadeed ee ay qabteen.

7) Waaxda Kastamku waxa ay qofka siinaysaa caddayn qoraal ah oo muujinaya faahfaahinta lacagta, macdanta ama agabka maaliyadeed ee laga qabtay.

8) Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan qabashada ku xusan faqradda (5) ee qodobkan waa in Baanka loogu gudbiyaa Baanka muddo siddeed iyo afartan (48) saacadood gudahood ah.

9) Haddii lacagta ama hantida la qabtay ay cidi ku sheegan waydo muddo laba sanno gudahood ah oo ka bilaabmaysa maalinta la qabtay, lahaanshaha hantidaasi waxa amar maxkamadeed ka dib la wareegaysa dawladda Somaliland si waafaqsan Xeerkan iyo Xeerarka kale ee dalka.

## CUTUBKA 6AAD

## LA WAREEGIDDA HANTIDA

### Qodobka 34aad – Amarrada la wareegidda

1) Mar kasta oo eedaysane lagu helo fal denbiyeed culus, waxa maxkmadda, iyada oo u eegaysa codsiga Xeer Ilaaliyaha Guud, Agaasimaha ama soo jeedinteeda, ay baadhi doontaa dheef kasta oo eedaysanuhu uu ka helay:

a) fal-denbiyeedkaa;

b) denbi kasta oo kale oo lagu xukumay isla dhegaysigaa; iyo

c) denbi kasta oo kale oo maxkmaddu ogaatay in uu fal-denbiyeedka xidhiidh la leeyahay, haddii ay maxkamaddu hesho in uu dheef ka haley, waxa ay, marka lagu daro ciqaab kasta oo ay ku soo rogtay, amraysaa in eedaysanuhu Dawladda ku wareejiyo qadder ay u aragto in habboon yahay, maxkamadduna waxa ay bixin

kartaa amarro dheeraad ah oo ay u aragto in ay u qalmaan si ay u hubiso wax ku oolnimada iyo caddaaladnimada amarkaa.

2) Qadderka ay maxkamaddu amri karto in eedaysanuhu Dawladda ku wareejiyo ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkani:

   a) Kama badan karo qiimaha dheefta eedaysanuhu ka helay falal denbiyeedka ama falal denbi oo la xihdiidha kuwa lagu sheegay faqraddaa, hadba sida ay maxkamaddu u go’aamiso si waafaqsan qodobada Cutubkan; ama

   b) Haddii maxkamaddu ku qanacdo in qadderka caddaaladda ah sida laga fili karo qodobka 37(1) ee Xeerkani uu ka yar yahay qiimaha lagu xusay faqradda (2)(a) ee qodobkan, qadderka eedaysanuhu bixinayaa kama badan karo qadder ay la tahay maxkamadda in laga heli karo eedaysanaha.

3) Maxkamadda xukunka ku rideysa eedaysane waxa ay, marka ay gebogebayso xukunka, tilmaami kartaa in ay baadhitaan ka furi doonto sida ku dhigan faqradda (1) ee qodobkan mar danbe haddii:

   a) ay ku qanacdo in baadhitaanku dib u ridayo xukunka eedaysanaha; ama

   b) Xeer Ilaaliyaha Guud ka codsado maxkamadda in ay marka hore xukunto eedaysanaha kuna qanacdo maxkamaddu in ay macquul tahay duruufuna kellifayaan.

4) Haddii garsooraha xukunka eedaysanaha gacanta ku hayaa maqan yahay, garsoore kasta oo isla maxkamadda ka tirsan ayaa eegi doona codsiga ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waxaanu qabanaya

fadhiga ku xusan faqraddaa qofkaasina waxa uu dhegaysiga ku qaadanayaa tallaabooyinkii garsaaraha maqani si sharciga waafaqsan u qaadan lahaa.

5) Maxkamadda dhegaysigani ka socdo, marka ay eegayso codsiga ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waxa ay:

a) Tixraaci kartaa caddaymaha ay dhegaysatay;

b) Waxay dhegaysan kartaa caddayno af ah oo dheeraad ah ama caddaymo qoraal ah hadba sida ay maxkamaddu u aragto in ay habboon tahay;

c) Fari kartaa Agaasimaha in uu maxkamadda keeno marag-muujinta lagu tilmaamay qodobka 38(1) ee Xeerkan; iyo

d) Fari kartaa in uu eedaysanuhu maxkamadda keeno marag-muujinta lagu tilmaamay qodobka 38(5) ee Xeerkan.

6) Xaddiga la amray in la bixiyo marka hanti lala wareego waxa la bixinayaa marka amarku dhaco,

Iyada oo se loo eegayo in eedaysanuhu u sheego maxkamadda in uu u baahan yahay wakhti uu ku xubiyo qadderka maxkamaddu amartay, maxkamadda amarka la wareegidda bixisay waxa ay bixin kartaa amar oggolaanaya in qadderka lagu bixiyo muddo cayiman gudaheed.

**Qodobka 35aad –**
**Dhawrista Dhinacyada Saddexaad**

1) Haddii maxkamadi amar ku bixiso in hanti lala wareego, qofka sheegta in uu hantida dan ku leeyahay waxa uu maxkamadda u gudbin karaa codsi la wareegidda ka hor, haddii ay maxkamaddu ku qanacdo marka ay ifafaalayaasha suura gal noqon kara eegto –

a) in qofkaasi aanu sinaba ugu jirin gelitaanka denbiga; iyo

b) haddii qofku danta ku yeeshay hantida intii denbigu dhacayey ama kadib, dantana uu siistay –

i) qiime macquul ah; iyo

ii) in aanu ogeyn, duruuftuna aanay keenayn shaki macquul ah, oo wakhtiga uu iibsanayey hantida aanu shaki ka gelin in hantidu wasakhaysan tahay, maxkamaddu waxa ay go'aamin doontaa nooca, xaddiga iyo qiimaha (wakhtiga amarka la bixinayo) danta qofka.

2) Iyada oo loo eegi doono faqradda (3) ee qodobkan, haddii la soo saaray amar la wareegid hantiyeed, qofka sheeganaya dan uu ku leeyahay waxa, inta aanay dhammaan muddada laba iyo tobanka bilood ah ee ka bilaabanaysa maalinta amarka la bixiyey, waxa uu codsi u qoran karaa maxkamadda si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan.

3) Qofka –

a) ogaa dhegaysiga maxkamadda ee amarka la wareegidda ka hor inta aanay maxkmaddu amarka bixin; ama

b) joogay fadhiga amarka la wareegidda lagu bixiyey,

loo oggolaan maayo in uu soo gudbiyo codsi sida ay dhigeyso faqradda (2) ee qodobkani, maxkamadda oo fasaxda mooyee.

4) Qofka codsi u soo gudbiya si waafaqsan faqradaha (1) ama (2) ee qodobkan waxa uu bixin doonaa

muddo ogeysiin ah oo aan ka yarayn afar iyo toban maalmood, codsiga oo uu ku hagaajin doono Agaasimaha oo qayb ka noqon doona dhegaysiga codsiga.

5) Codsadaha ama Agaasimuhu, si waafaqsan shuruucda maxkamadda awoodda u leh, waxa ay codsi ka dhan ah amarka ku xusan faqradda (1) ee qodobkan u gudbin karaan Maxkamadda Racfaanka.

6) Qof ay maxkamaddu u magacawday si waafaqsan Xeerkan in uu noqdo haye ama wakiil, haddii codsi loogu soo gudbiyo si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, iyo haddii muddada ay shuruucdu oggoshahay in racfaan lagu gudbiyo ay dhaaftay, racfaan ka dhan ah amarkana la soo saaray –

a) waxa qofka maxkamaddu magacawday farayaa in hantida ama qayb ka mid ah oo codsaduhu dan ku leeyahay, loo celiyo codsadaha; ama

b) waxa uu farayaa in qadder le'eg qiimaha danta uu ku leeyahay hantida codsaduhu, sida uu caddeeyay go'aanka maxkamaddu, la siiyo codsadaha.

7) Maxkamaddu waxa ay –

a) ka hor inta aanay soo saarin amar la wareegideed; ama

b) haddii hanti amar xayiraad ah la saaray, amarkaana loo gaadhsiiyey si waafaqsan qodobka 14aad ee Xeerkan, ama haddii ay tahay hanti maxkamadi amartay in la qabto, dhinac dhigi doontaa qaadista ama wareejinta hantida ee dhacday qabashada ka dib ama gaadhsiinta amarka xayiraadda, haddii aan hantida lagu wareejin niyad wanaag ku haynaya.

## Qodobka 36aad –
## Qiimaha Dheefaha Dembiyeed

1) Iyada oo loo eegayo faqradda (2) ee qodobkan, qiimaha dheefta denbi ee eedaysanuhu waxa ay noqon doontaa wadarta isu geynta qiimaha hantida, adeegyada, faa'idada iyo abaal-gudyada uu ku helay dhaqan-galka Xeerkan kadib ee lala xidhiidhinayo gelitaanka fal-denbiyeedka isagu galay ama qof kale.

2) Marka go'aan laga gaadhayo qiimaha dheefta denbi, maxkamaddu waxa ay:

a) Haddii ay bixisay amar hantida lagula wareegayo ama hore loo bixiyey oo maxkamadda ku qanciyey in:

i) hantida uu eedaysanuhu helay ahayd mid lagu xidhiidhinayo fal-denbiyeed uu galay isaga ama qof kale; ama

ii) hantidu, si toos ah ama si dadban, ay ugu jirtay gacanta eedaysanaha ama maamulkiisa, taas oo uu xidhiidhkaa ku helay,

ma siin doonto hantida wax tixgelin ah;

b) Haddii amar la wareegid hore loogu riday eedaysanaha, tixgelin la siin maayo dheefaha denbi ee ay maxkmaddu ku qanacday in xisaabta lagu daray markii go'aanka laga gaadhayey qadderka ay tahay in lagu soo celiyo amarka la wareegidda.

## Qodbka 37aad –
## Qaddarka (Xaddiga) Lala Wareegi Karo

1) Marka loo eego ujeeddooyinka qodobka 34(2)(b) ee Xeerkan, qadderka laga heli karo wakhtiga lagu

ridayo amarka la wareegidda ah eedaysanaha, waxa uu noqon doonaa wadarta isu-geynta qiimayaasha markaa ee dhammaan—

a) hantida laga heli karo eedaysanaha; iyo

b) hadiyado lagu siiyey sifo aan sharci ahayn, oo laga jaro dhammaan waajibaadka lagu leeyahay, haddii ay jiraan, ee saaran eedaysanaha maxkamadduna ay sidaas u aqoonsato.

2) Qiimaha hadiyad lagu helay sifo aan sharci ahayn wakhtiga la bixinayo amarka la wareegidda waxa ay noqon doontaa —

a) qiimaha hadiyadda sharciga khilaafsan ay lahayd markii haystaha la siiyey, iyada oo loo eegayo isbeddalka lacagta ku dhacay muddadii uu haystay; ama

b) haddii lagu dabbaqayo faqradda (3) ee qodobkan, qiimaha lagu sheegay qaybtaas ayaa la qaadanayaa, qiimihii doonaa ha weynaadee; ama

c) Qadderka ay maxkamaddu aaminsan tahay in uu caddaalad yahay.

3) Haddii wakhtiga la soo saarayo amarka la wareegidda uu haystuhu gacanta ku hayo hantida—

a) oo aan aalad lacageed ahayn, taas oo qofkaasi helay, qiimaha hantidu waxa uu noqonayaa qiimaha wakhtigaa ay leedahay; ama

b) iyada oo si toos ah ama si dadban ugu jirta gacantiisa hantida uu helay qofku, qiimaheedu waxa uu noqonayaa qiimaha wakhti amarku ku dhacayo.

4) Iyada oo loo eegayo ujeeddooyinka faqradda (1) ee qodobkan, fulinta waajibka ayaa ka mudnaan doonta bixinta amarka la wareegidda haddii waajibku yahay mid jidaynaya—

a) in eedaysnaha, haddii maxkamadi ku heshay denbi, kuna xukuntay in uu bixiyo—

i) ganaax maxkmaddu ku ridday wakhtigaa ka hor; ama

ii) qadderkii uu doono ha noqdee, amar ay maxkmaddu bixisay wakhtigaa ka hor;

b) kaas oo –

i) haddii dhul ama guri uu lahaa hore loola wareegay dayn lagu yeeshay awgeed; ama

ii) Haddii eedaysanuhu yahay shirkad ama shakhsiyad qaanuuni ah, oo wakhtigaa shirkadda ama shakhsiyadda qaanuuniga ah la gebogebaynayo, waxa lacagta loo bixinayaa iyada oo loo eegayo lacagta soo hadha marka gebogabeynta kadib sida ay hadba arrintu tahay.

5) Maxkmaddu ma go'aamin doonto qadderka la siinayo hatida sida ku xusan faqradda (1) ee qodobkan ilaa ay siiso dhammaan shakhsiyaadka dano ku leh fursad ay ku soo bandhigaan qiimaha ay aaminsan yihiin in hantidu leedahay.

**Qodobka 38aad –**
**Caddaymaha la xihdiidha dheefaha denbiyeed**

1) Agaasimuhu waxa uu keeni karaa, ama maxkmaddu amar ku siin kartaa in uu keeno, marag-muujin uu ka hayo eedaysanaha ama qof

kasta oo kale oo xidhiidh la leh arrin maxkamaddu dhegaysaneyno si waafaqsan qodobka 34(1) ee Xeerkan, ama mid xidhiidh la leh go'aaminta qiimaha lacageed ee dheefaha denbi ee eedaysanaha.

2) Nuqul ka mid ah marag-muujinta lagu sheegay faqradda (1) ayaa la siin doonaa eedaysanaha.

3) Eedaysanuhu waxa uu ka doodi karaa saxnimada eed kasta oo ku jirta marag-muujinta lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan, haddii uu eedaysanuhu dooddaa keenana, waxa uu sheegi doonaa caddaymaha uu cuskanayo.

4) Haddii aanu eedaysanuhu ka doodin saxnimada eedda ku jirta marag-muujinta ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, eeddaasi waxa ay noqonaysaa mid kama danbays ah oo caddayn u ah arrinta ay la xidhiidho.

5) Eedaysanuhu waxa uu keeni karaa, ama ay maxkmaddu amar ku siin kartaa in uu keeno, marag-muujin ama xaqiijin qoraal ah oo isaga ama qof kale qoray oo xidhiidh la leh go'aaminta qadderka laga heli karo hantida sida uu dhigayo qodobka 39(1) ee Xeerkan.

6) Nuqul ka mid ah marag-muujinta ama xaqiijinta maxkmadda loo keenay sida u dhigayo faqradda (5) ee qodobkan ayaa la siin doonaa Agaasimaha.

7) Agaasimuhu waxa uu qiri karaa saxnimada eed kasta oo ku jirta marag-muujinta ama xaqiijinta maxkamadda loogu soo gudbiyey si waafaqsan faqradda (5) ee qodobkan.

8) Haddii uu Agaasimuhu qiro saxnimada eed kasta oo ku jirta marag-muujinta ama xaqiijinta loo soo gudbiyey si waafaqsan faqradda (5) ee qodobkan, eeddaas waxa loo tixgelin doonaa in ay caddayn kama danbeysa ah u tahay arrinta ay la xidhiidho.

## Qodobka 39aad –
## Hadiyadaha

1) Iyada loo eego ujeeddooyinka Cutubkan, eedaysana waxa loo arkayaa in uu hadiyad bixiyey haddii uu hanti si toos ah ama si dadban ugu wareejiyey qof kale isaga oo ka qaatay lacag ka yar ta hantidu suuqa ka marayso.

2) Iyada oo loo eegayo ujeeddooyinka faqradda (1) ee qodobkan, hadiyadda loo arko in uu bixiyey eedaysane waxa ay ka koobnaan doontaa saamiga hantida uu wareejiyey ku jira ee le'eg faraqa u dhaxeeya qiimaha hantida oo idil iyo qiimaha uu eedaysanuhu ka helay.

## Qodobka 40aad –
## Saamaynta amarrada la wareegidda

Haddii maxkamadi bixiso amar la wareegid ah, amarku waxa uu yeelan doonaa saamayn go'aan madani ah.

## Qodobka 41aad –
## Habraaca haddii qofku baxsado ama geeriyoodo

1) Haddii maxkamadi ku qanacdo in:

i) qof lagu eedeeyay fal-denbiyeed; ama

ii) qof lagu helay fal-denbiyeed; ama

iii) amar xayiraadeed lagu riday qofka; ama

iv) ay jirto caddayn ku filan oo muujinaysa in baadhitaan lagu samaynayo qof fal-denbiyeed uu galay; iyo

b) in waaran xadhig loo jaray in qofkaa la soo xidho, maxkmadana aanu iman karin kadib markii la qaaday tallaabooyin macquul ah oo lagu fulinayo waarankaa;

c) dhegaysiga dacwadda qofkaana aan dib loo bilaabi karin muddo lix bilood gudahood ah maqnaanshihiisa awgeed; iyo

d) in ay caddaymo macquul ahi jiraan oo lagu aamini karo in qofkaa lagu ridi lahaa amar la wareegid hanti haddii aanu maqnaadeen, maxkamaddu waxa ay, iyada oo u eegaysa codsiga Agaasimaha, dhegaysi ka furaysaa faa'ido kasta oo uu ka heli lahaa fal-denbiyeedkaa.

2) Haddii eedaysane la xukumay geeriyoodo amarka la wareegidda ka hor, maxkamaddu, iyada oo u eegaysa codsiga Agaasimaha, waxa ay baadhitaan ku samayn kartaa faa'idada uu ka dheefi lahaa fal-denbiyeedka haddii maxkamaddu ku qanacdo in ay jiraan caddaymo lagu kalsoonaan karo oo tilmaamaya in amar la wareegid hanti la bixin lahaa haddii aanu eedaysanuhu geeriyoodeen.

3) Maamulaha dhulka ama guriga marxuunka geeriyooday waxa uu hor iman karaa maxkamadda waxaana la weydiin karaa su'aalo.

4) Maxkamad dhegaysi dacwadeed u samaynaysa si waafaqsan qodobkan waxa ay—

a) Haddii ay hesho in qofka ay ka hadlayaan faqradaha (1) ama (2) ee qodobkani uu dheef ka helay, waxa ay bixinaysaa amar la wareegid hanti, qodobada Cutubkan ayaana lagu dabbaqayaa, iyada oo lagu sameeyey isbeddallada lama huraanka ah, si loo bixiyo amarkaa;

b) Haddii la magacaabay qof guddooma hantida, waxa ay maxkamaddu magacaabaysaa qof hantida lala wareegayo guddooma; iyo

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

c) Waxa ay bixinaysaa awoodda lagula wareegyo hantida laga hadlayo.

5) Maxkamadi ma adeegsan doonto awooddaha ku xusan faqradda (4)(a) ama (c) ee qodobkan ilaa ay siiso dhammaan dadka ku leh danaha hantida fursad lagu matalo marka amarka la bixinayo.

6) Qodobka 38aad ee Xeerkan laguma dabbaqayo dhegaysi dacwadeed loo dhegaystay si waafaqsan qodobkan.

7) Haddii qof, kuma jiro qofka ay ka hadlayso faqradda (1) (a) (ii) ee qodobkan, kaas oo lagu riday amar la wareegid hanti si waafaqsan faqradda (4) ee qodobkan, mar danbe maxkmad la saaray—

a) Laguna helay mid ama fal-denbiyeedyo kale oo amarku ka dhashay, maxkamadda xukumaysa qofku waxa ay fadhi u qaban kartaa si waafaqsan qodobka 34(1) ee qodobkan waxaanay ku ridi kartaa amar ku habboon;

b) Laguna waayey fal-denbiyeedka amarka laga soo saaray, maxkamadda denbiga ku weyday waxay soo saari kartaa amar ku habboon.

## CUTUBKA 7AAD

## AMARRADA BIXINTA IYO AWOODAHA KALE EE XOG URURINTA

### Qodobka 42aad –
### Amarrada bixinta xogta

1) Haddii qof lagu eedeeyo ama lagu helo fal-denbiyeed, sarkaal boolisna uu hayo caddaymo macquul ah oo uu ka shakiyo in qof hayo ama maamulo –

a) Warqad wax ka tari karta aqoonsiga, sugidda goobta ay taallo, ama xaddiga hantida qofka, ama ay wax ka tari karto aqoonsiga ama sugidda goobta ay taallo warqad lama huraan u ah wareejinta hantida qofkaa; ama

b) Warqad wax ka tari karta aqoonsiga, sugidda goobta ay taallo, ama xaddiga hantida wasakhaysan, ama aqoonsiga ama sugidda goobta ay taallo warqad lama huraan u ah wareejinta hantida wasakhaysan ee lala xidhiidhayo fal-denbiyeedka, sarkaalka booliska ahi waxa uu gudbin karaa codsi gaar ah isaga oo ku kaabaya marag-muujin salka u dhigaysa kuna lifaaqaya caddaymaha la xidhiidha falka si maxkmaddu amar ugu riddo qofka laga shakiyey in uu hayo ama maamulo warqad jaakeedu yahay nooca la xusay.

2) Sarkaalka booliska ah ee warqadaha loo dhiibay waxa uu –

a) baadhi karaa waraaqaha;

b) sawiran karaa waraaqaha; ama

c) Waxa uu hayn karaa warqadda wakhtiga ugu dheer ee macquul si loo gaadho ujeeddooyinka Xeerkan.

3) Haddii uu sarkaalka booliska ahi haysto waraaqaha loo dhiibay, waxa uu u sawiri doonaa waraaqaha qofka u dhiibay.

## Qodobka 43aad

## Awoodda lagu baadhayo laguna qaadayo waraaqaha loogu baahan yahay in lagu sugi goobta hantidu taallo

1) Sarkaal boolis oo sita waaran sharci ah oo loo jaray si waafaqsan qodobka **44aad** ee Xeerkani waxa uu –

a) Geli karaa dhul ama goob xafiis;

b) Ka baadhi karaa dhulka ama xafiiska warqad kasta oo jaadkeedu yahay midka lagu qeexay qodobka **29(1)**; iyo

c) Qaban karaa warqad kasta oo uu helay intii uu baadhitaanka ku jiray oo sarkaalku aaminsan yahay, isaga oo caddayn macquul ah u haya, in ay tahay warqad wax ka tari karta fal-denbiyeed, haddii gelitaanka, baadhida ama qabashada la fuliyo.

2) Sarkaal kasta oo fulinaya awoodaha Xeerkan ama xeer-nidaamiye kasta oo farcama kaas oo, isaga oo aan hayn sabab qoran –

a) Baadha ama amra in dhisme ama goob la baadho; ama

b) Haya, baadha ama xidha qof, waxa uu galay fal-denbiyeed haddii lagu helo xukunkiisu noqonayo xabsi aan ka badnayn saddex sannadood, ama ganaax aan ka badnayn Sl Shillings 10,000,000 (Toban Milyan) ama labada oo la isugu daro.

## Qodobka 44aad

## Waaran baadhitaan goob waraaqo yaallaan si hanti loo sugo goobta ay taallo

1) Haddii –

a) Qof lagu eedeeyay ama lagu helay fal-denbiyeed; ama

b) Sarkaal boolis ahi uu hayo caddayn macquul ah oo uu kaga shakiyo in warqad jaadkeeda lagu tilmaamay qodobka **42(1)** ee Xeerkani taallo, ama la keeni doono dhul ama xafiis, laba iyo toddobaatanka saacadood ee soo socda, sarkaalka booliska ahi waxa uu maxkamad awood u leh u gudbin karaa codsi uu ku badhi-taarayo marag-muujin si waaran baadhitaan loogu jaro dhulkaa ama xafiisyadaa.

2) Haddii codsi waaran baadhitaan dhul ama dhisme loogu soo gudbiyo maxkamadda si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, iyada oo u eegaysa faqradda (4), waxa ay maxkamaddu jari kartaa waaran sarkaalka booliska ah, magaciisa ha lagu sheego waaranka ama yaan lagu sheegin, iyada oo uu kaashanayo xoogga uu u baahan yahay ee macquulka ah –

a) in uu galo dhulka ama dhismaha oo uu baadho hanti jaadkaas ah; iyo

b) in uu qabto hantida uu halay intii uu baadhitaanka wadey taas oo sarkaalka booliska ahi aaminsan yahay isaga oo caddayn macquul ah u haya in ay tahay hantidii.

3) Maxkamadi ma jari karto waaranka faqradda (2) dhigayso ilaa ay ku qanacdo in –

a) hore loo bixiyey amar lagu farayo in la bixiyo warqadda la doonayo, aan se loo hoggaansamin; ama

b) amar lagu farayo in warqadda la bixiyaa ay adag tahay in uu wax ku ool noqdo; ama

c) baadhitaanka waaranka awgii loo jaray wax loo dhimi karo haddii sarkaalka booliska ah aan si dhakhso ah loo siin warqadda uu baadhayo iyaa oo aan cid kale lala socodsiin; ama

d) Warqadda la baadhayo aan loo tilmaami karin si faahfaahsan si amar loogu bixiyo helitaankeeda.

4) Waaran loo jaray si waafaqsan qodobkani waxa uu xusi doonaa –

a) ujeeddada loo jaray, oo ay ka mid tahay nooca fal-denbiyeedka lala xidhiidhinayo;

b) faahfaahin ah nooca waraaqadha la amray in la soo qabto;

c) wakhtiga dhaqal-galkiisu ku egyahay; iyo

d) in gelitaanka la fasaxay goor kasta oo maalinta ka mid ah ama habeenka ama saacado go'an gudahood.

5) Haddii inta uu socdo baadhitaanka waaranka loo jaray sida ku cad qodobkan, sarkaalka booliska ahi helo –

a) warqad nooceedu yahay midda ku xusan qodobka **42(1)** ee Xeerkan sarkaalka booliska ahina aaminsan yahay isaga oo caddayn macquul ah u haya in ay la xidhiidho fal-denbiyeedka la baadhayo, ama fal-denbiyeed kale; ama

b) wax kasta oo kale oo sarkaalka booliska ahi aaminsan yahay isaga oo caddayn macquul ah u haya in ay caddayn u

noqon karto fal-denbiyeed la galay, sarkaalka booliska ahi wuu qaban karaa hantidaa waxaana loo qaadanayaa in waaranku fasaxayo qabashadaa.

## Qodobka 45aad
## Baadhitaanka la fuliyo sababo qoran la'aantood

1) Sarkaal kasta oo u fulinaya awoodaha Xeerkan ama Xeer-nidaamiye kasta oo ka farcama, oo sabab la'aan qoraal uga sameeya –

a) Baadhitaanno ama sababa in la baadho dhisme ama goob; ama

b) Haya, baadha ama xidha qof, wuxuu galay fal-denbiyeed haddii lagu helo xukunkiisu noqonayo xabsi aan ka badnayn shan sannadood, ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn SL Shillings 10,000,000 (Toban Milyan) ama waa la isugu dari karaa.

# CUTUBKA 8AAD

# FAL-DENBIYEEDYADA IYO CIQAABAHA

## Qodobka 46aad
## Ciqaabaha shakhsiyaadka dabeeciga ah

1) Shakhsiga dabeeciga ah ee lagu helo fal-denbiyeed maydhaanka lacageed sida ku cad qodobka 4aad ee Xeerkan waxa lagu ciqaabi doonaa ciqaabahan soo socda mid ka mid ah:

a) xabsi aan ka yarayn saddex sannadood kana badnayn shan sannadood;

b) ganaax lacageed oo aan ka yarayn SL Shilling 50,000,000 kana badnayn SL Shilling 100,000,000;

c) ama labada faqradood ee (1)(a) iyo (b) ee qodobkan haddii denbiga weheliyaan xaaladaha cusleeya denbiga.

2) Qod kasta oo ku xad-gudba waajibaadka ku xusan qodobka **15(2) iyo (3)** ee Xeerkani waxa uu galay fal-denbiyeed waxaana lagu ciqaabi doonaa:

a) xabsi aan ka yarayn hal (1) sannadood kana badnayn saddex (3) sannadood;

b) ganaax aan ka yarayn SL Shilling 50,000,000 kana badnayn SL Shilling 100,000,000;

c) Labada waa la isugu dari karaa (a) iyo (b), iyada oo lagu salaynayo dhaawaca fal-denbiyeedku sababay.

3) Shakhsi dabeeci ah ee ku xad-gudba qodobada sharci ee ku xusan qodobka 17aad ee Xeerkani waxa uu mutaysanayaa ganaax aan ka yarayn SL Shilling 5,000,000(Shan milyan) kana badnayn SL Shilling l0,000,000 (Toban Milyan)

4) Shakhsi dabeeci ah ee jabiya qodobada sharci ee ku xusan qodobka **32(2)** ee Xeerkani waxa uu galay fal-denbiyeed, waxaana lagu ciqaabayaa:

a) xabsi aan ka yarayn hal sanno (1) kana badnayn saddex (3) sannadood;

b) ganaax aan ka yarayn SL Shilling 50,000,000 kana badnayn SL Shilling 100,000,000;

c) Labada (a) iyo (b) ee kor ku xusan, iyada oo loo eegayo dhaawac fal-denbiyeedku sababay.

5) Qof kasta oo ku guul-darraysta in uu u hoggaansamo qodobka 34(2) ee Xeerkani waxa uu galay fal-denbiyeed waxaanu mutaysanayaa

ganaax gaadhsiisan ilaa boqolkiiba afar iyo labaatan ee qiimaha lacagta, dhagxaanta/biraha qaaliga ah iyo aaladda lacageed ee adeedaysanuhu sito.

6) Qof kasta oo jabiya qodob sharci oo ka mid ah Xeerkani haddii aan ganaaxa lagu tilmaamin Xeerkan waxa uu mutaysanayaa ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Guud.

**Qodobka 47aad**

**Ciqaabaha ku waajibaya shirkadaha iyo hay'adaha**

1) Shirkadda ee lagu helo fal-denbiyeed maydhaanka lacageed ama maalgelin argagixiso, sida ku dhigan qodobka 4aad ee Xeerkan, waxa lagu ciqaabayaa

a) Ganaax aan ka yarayn SL Shilling 200,000,000 (Laba Boqol Milyan), kana badnayn SL Shilling 1,200,000,000 (Hal Bilyan iyo Laba boqol Milyan); ama

b) Ruqsadda oo si kama-danbays ah loogala noqdo iyada oo ku xidhan culuyska xad-gudubka.

2) Shirkadaha waxa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka yarayn SL Shilling 50,000,000 (Konton Milyan), kana badnayn SL Shilling 100,000,000 (Boqol Milyan), haddii ay u hoggaansami waayayaan qodobka 15aad ee Xeerkan.

3) Waaxdu waxa ay shirkadda jebisa waajibaadyada ku xusan qodabada cutubka 5aad ee Xeerkan ka qaadi kartaa mid ka mid ah tallaabooyinkan:

a) In la siiyo digniin qoraal ah oo lagu farayo inay ku saxdo waajibaadka ay jebisay muddo sagaashan (90) maalmood gudahood ah.

b) In si ku meel gaadh ah muddo cayiman il gaar ah lagu hayo iyadoo Shirkaddu

muddadaas gudaheeda Baanka ugu soo gudbin doonto warbixinno xilliyeed;

c) In la xaddido hawlaha shirkadd loo ogol yahay inay qabto si Xeerkan waafaqsan iyo Xeerarka kale ee dhaqangalka ah;

d) In gebi ahaanba ruqsadda lagala noqdo haddii ay ku guul darraysato inay u hoggaansato xubnaha (a), (b) iyo (c) ee farqaddan.

## Qodobka 48aad
## Awoodda Fulinta Xeerka

Baanku wuxuu ku yeelnayaa shirkadaha uu kormeero awoodahan soo socda si uu u fuliyo qodobada Xeerka.

1. In uu kala taliyo Shirkadaha in ay ka qaadan tallaabo ku haboon sarkaalka qaabilsan maydhitaanka laacagaha ama agaasime kasta oo kale oo ku kacay fal-denbiyeed ka dhan ah Xeerkan.
2. Tilmaamo kasta oo ku meel gaadh ah kuwaas oo la siiyay shirkad si waafaqsan Xeerka waa in lagu gudbiyo qoraal ahaan iyada oo la raaciyo qoraal qeexaya tallaabooyinka la farayo in ay shirkadu qaaddo.
3. Go'aamada ka soo baxa Baanka waxa rafcaan loga qaadanayaa Gudidda Xalinta Khilaafaadka maaliyadeed sida uu dhigayo Cutubka 13aad ee Xeerka Bangiga Dhexe Xeer Lr. 54/2012 si ay dib ugu eegaan tilmaamo kasta oo la siiyay oo aanay Shakhsiga ama shirkadu raali ka ahayn muddo 30 Maalmood gudohood ah, go'aankooduna waa dhaqangal hadii aan looga rafcaan qaadan Maxkamada awoodda leh oo go'aanka kama dambeysta ah leh.

## CUTUBKA 9AAD

## ISKAASHIGA CAALAMIG AH

### Qodobka 49aad
### Mabaa'diida wada-shaqaynta

1. Marka loo eego ujeeddooyinka Cutubkan, mabaa'diida wada-shaqaynta iyo wax is weydaarsigu waa in had iyo jeer la dhawro.

2. Marka lagu guda jiro baadhitaan ama dhegaysi dacwadeed si waafaqsan Xeerkan, Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu ka codsan karaa hay'adda awoodda u leh ee dal kale in ay usoo gudbiso:

   a) Caddayn ama qoraal, waraaqo ama qodobo laga helayo dalkaa;

   b) Waaran ama aalad kale oo sharci oo oggolaanaysa baadhitaan ama qabasho laga fuliyo dalkaa;

   c) Macluumaadka qof dalkaa ka socda oo looga baahday inuu yimaaddo Somaliland si uu gacan uga geysto hawlaha baadhitaanka; ama

   d) Amar xayiraadeed ama la wareegid hanti oo loo sameeyey si waafaqsan Xeerkan oo dalkaa laga dhaqan gelinayo, ama amar la mid ah oo laga fuliyo dalkaa si loo ilaaliyo hanti haddii laga heli lahaa Somaliland loola wareegi lahaa si waafaqsan Xeerkan;

   e) Amar ama ogeysiis waafaqsan Xeerkan oo lagu rido qof dalkaa jooga; ama

   f) Kaalmo kale oo loo bixiyo si waafaqsan heshiis ama qorshe qoran oo ka dhaxeeya Somaliland dalkaa.

3. Codsiyada dalal kale uga yimaadda Somaliland ee jaadkooda lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan

waxa qoraal ahaan loogu gudbinayaa Xeer Ilaaliyaha Guud.

**Qodobka 50aad**
**Macluumaadka Codsiyada**

1. Codsiyada wada-shaqayntu waa inay ku caddaadaan faahfaahinta arrimaha hoos ku xusani: –

   a) Magaca Hay'adda soo codsatay gacan siinta;

   b) Magaca Hay'adda codsigu ku socdo;

   c) Ujeeddada codsiga iyo haddii ay jiraan fiirooyin gaar ah oo la xidhiidha xaaladda;

   d) Xaqiiqooyinka kaabaya codsiga;

   e) Faahfaahin kasta oo caawinaysa aqoonsiga qofka oo ay ka mid yihiin: xaaladda guurka, dhalashada, Cinwaankiisa iyo shaqada iwm;

   f) Qodobada sharci ee ka yaalla fal-dembiyeedka;

**Qodobka 51aad**
**Hab Adeegsiga Codsiyada**

1. Caddayn, waraaqo ama qodobo waafaqsan codsi loo sameeyey si waafaqsan qodobka 50aad ee Xeerkan waxaa –

   a) Loo qabanayaa caddayn ahaan Somaliland gudaheeda;

   b) Aan loo isticmaali doonin ujeeddo ka duwan ta loo codsaday, marka laga reebo in la helo oggolaanshaha hay'adda soo bixisay ee dalka shisheeye; iyo

c) La celin doonaa marka isticmaalkeeda laga maarmo, haddii aanay hay'addaasi si kale ku talin.

**Qodobka 52aad**

**Codsiyada Somaliland loo soo gudbiyo ee ah waaran baadhitaan**

1) Marka dal kale Somaliland ka soo codsado in laga kaalmeeyo helitaanka iyo fulinta waaran baadhitaan iyo mid qabasho hanti si waafaqsan xeer dalkaa dhaqan gal ka ah, Xeer Ilaaliyaha Guud ayaana ka dalban kara Maxkamadda Sare in la jaro waaranka la soo codsaday.

2) Haddii, marka ay codsiga hesho, Maxkamadda Sare ay ku qanacdo –

a) In dhegaysi dacwadeed ama baadhitaan la xidhiidha fal-denbiyeed culusi ka dhacay dalka codsiga soo gudbiyey; iyo

b) In caddaymo macquul ahi jiraan oo tilmaamaya in caddayn wax ka tari karta baadhitaanka ama dhegaysiga dacwaddu yaallo Somaliland gudaheeda, waxay jari kartaa waaran waafaqsan qaybtan oo fasaxaya gelitaanka si loo baadho caddaynta la doonayo haddii la helana la gacanta lagu dhigo.

3) Sharci kasta oo qoran oo la xidhiidha gudbinta iyo bixinta codsi si loo fuliyo waaran baadhitaan waxa lagu dabbaqayaa sida codsiga waaranka loo fuliyo ee uu dhigayo Xeerka Habka Ciqaabtu.

**Qodobka 53aad**

**Codsiyada Somaliland loo soo Gudbiyo si Amarrada Qaar loo Fuliyo**

1) Haddii –

a) Maxkamad dal kale ay bixiso amar xayiraadeed ama mid la wareegid

hantiyeed, oo xidhiidh la leh fal-denbiyeed ka dhacay sharci kan oo kale ah oo u yaalla dalkaa; iyo

b) Dalkaasi ka codsado Somaliland kaalmo in amar lagu fuliyo hanti la aaminsan yahay in ay Somaliland taallo, Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa ka codsanaya Maxkamadda Sare in codsiga la diiwaan geliyo.

2) Haddii Xeer-ilaaliyaha Guud ka codsado Maxkamadda Sare in ay diiwaan geliso amar waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, Maxkamadda Sare waxa ay diiwaan gelin doontaa codsiga.

3) Codsi loo diiwaan geliyey si waafaqsan qodobkani waxa uu noqonayaa dhaqal gal waxaana loo fulin doonaa si la mid ah sida loo amarrada loo bixiyey si waafaqsan Xeerkan ama amarrada la wareegidda hantida, hadba sida arrintu tahay haddii ay Maxkamada Sare ku qanacdo in –

a) Amarku yahay kama-danbeys, aan laga qaadanayn racfaan, nuqul la xaqiijiyay oo amarka ah oo summadda iyo saxeexa maxkmadda leh la gudbiyey;

b) Qofka hantidiisa amarka laga soo saaray uu helay ogeysiin la xidhiidha dhegaysiga dacwadda ee Somaliland dibaddeeda oo uu helay fursad uu ku difaaco danta uu ku leeyahay hantidaa; iyo

c) Fulinta amarku aanay caddaaladda wax u dhimayn.

4) Si loo ilaaliyo helitaanka hanti taalla Somaliland oo dacwad la wareegid hanti ku socodo taas oo lagu fuliyey ama ay u badan tahay in lagu fuliyo dal kale, Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu

maxkmadda ka codsanayaa in amar xayiraadeed la saaro hantidaa.

5) Marka ay bixinayso amarka xayiraadda waxa ay maxkmaddu isku hallayn kartaa macluumaadka ku jira codsiga ka yimi dalka kale ee qeexaya nooca baadhitaanka ama dhegaysiga socda taas oo noqonaysa caddaynta loo cuskanayo in hantida la sheegay lagu magic-dhebi doono amar la wareegid hanti marka dhegaysiga dacwaddu dhammaado.

6) Nuqul ka mid ah codsiga diiwaan gelinta iyo amarka fulinta ee ka yimi dal kale ayaa la siin doonaa qofka leh ama maamula ama dan kale oo sharci ku leh hantida si waafaqsan sida ogeysiisyada maxkamdeed ee dalkaa loo bixiyo.

7) Qof xaq u leh ogeysiis waafaqsan faqradda 6aad ee qodobkan waxa uu haystaa soddon maalmood oo ka bilowda maalinta uu helo ama la baahiyo ogeysiiska, labada maalmood tooda danbe, si uu u xareeyo diidmo uu kaga doodayo amarka fulineed ee kaga yimi dal kale.

8) Ilaa qof diidmo ka qaba amar ka yimi dal kale sugo mid ka mid ah shuruudaha ku xusan qodobka **35(1)** ee Xeerkan, waxa ay maxkamaddu go’aansan kartaa in amarka ay bixinaysaa yahay lama huraan si loo fuliyo amarka maxkamadda dalkaa kale, waxaana maxkamadda dabraya xaqiiqooyinka ku sugan amarkaa shisheeye.

9) Haddii amar dal kale ka yimi uu tilmaamayo in lacag la bixiyo, isla markaana uu ku sheegay xaddiga la bixinayo cumlad aan ahayn lacagta Somaliland, xaddiga lacageed ee la bixinayo waxaa loo beddalayaa SL Shilin ama Doolarka Maraykanka, waxaana lagu sarrifayaa qiimaha sarrifka ee rasmiga ah ee maalinta amarka la diiwaan geliyo.

10) Haddii Xeer Ilaaliyaha Guud u arko in ay habboon tahay qorshe caalami ah oo jira awgeed ama la ogol yahay ama danta guud ku jirto, wuxuu markaa amar ku bixin karaa in dhammaanteed ama qayb ka mid ah hantida loola wareegay si waafaqsan faqradda (7) ee qodobkan ama qiimihiisa loo celiyo ama dib loogu diro dawladda soo codsatay.

**Qodobka 54aad**
**Diidmada Fulinta Codsiyada**

1. Codsi iskaashi waa la diidi karaa haddii:

    i. Aanu codsigu ka soo bixin Hay'ad Sharci oo awood u leh oo ka jirta dalkaa;

    ii. Aan la soo marin codsiga dariiqadda ku haboon;

    iii. Fulintiisu ay dhaawacayso madaxbannaanida, sharciga iyo kala dambaynta, nabadgelyada ama mabaadii'da aasaasiga ah ee dalka;

    iv. Fal-dembiyeedka la soo codsaday uu la xidhiidho dhegaysi dacwadeed oo ka oogan ama go'aan kama dambays ay ka gaadhay maxkamad ku taalla dalkaas;

    v. Tallaabooyinka la soo codsaday aanay ku habboonayn ku xusan codsiga;

    vi. Ay jiraan xaqiiqooyin la aaminsan yahay in tallaabooyinka la soov codsaday ay ku salaysan yaihiin keliya isirka, diinta, dhalashada, jinsida, qowmiyadda ama aragtidiisa siyaasadeed;

2. Dawladda Jamhuriyadda Somaliland waa inay ku wargeliso dalka codsaday iskaashi sababta diidmada fulinta codsiga loo soo gudbiye iyada oo ugu jawaab celinaysa muddada ku habboon.

3. Ilaalinta sirta macaamiishu kuma fillaan karto in loo cuskado sababta diidmada codsiga.

**Qodobka 55aad**
**Is-dhaafsiga denbiilayaasha**

1) Maydhaanka lacagaha iyo maalgelinta argagixisadu waa fal-denbiyeedyo denbiilayaasha gala la is-dhaafsan karo.

2) Isdhaafsiga denbiilayaasha waxa loo fulinayaa si waafaqsan qodobka 35aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, qodobka 11aad ee Xeerka Ciqaabta, qodobka 278aad ee Xeerka Habka Ciqaabta ama xeerar kale oo Somaliland u yaalla.

## CUTUBKA 10AAD

## QODOBO QUBANE AH

**Qodobka 56aad**
**Soo Saaritaanka Xeer-nidaamiyayaal**

1) Marka ay fulinayaan awoodaha Xeerkan, Baanka iyo Waaxda Daba-galka Maaliyaddu waxa ay soo saari karaan xeer-nidaamiyayaal lama huraan u ah fulinta Xeerka.

2) Xeer-nidaamiyayaasha ay soo saaraan Baanka iyo Waaxda Daba-galka Maaliyaddu waxa ay faahfaahin doonaan waajibaadka iyo hababka loogu dhaqangelinayo qodobadan Xeerkan.

**Qodobka 57aad**
**Dhaqangalka Xeerka**

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo Golaha Wakiilada, isla markaan uu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | Baashe Maxamed Faarax |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL. | Guddoomiyaha ee Golaha Wakiilada JSL. |